JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.010** **Taariikh: 20 Maarso 2023**

# OGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIADEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

## MADAXWEYNAHA J.F.S.,

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka “F” ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0238/B11/23**, ku taariikheysan **14/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Lagu Hagayo Nidaam Maaliyeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa.**

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

### Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa.

### Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
22 MAR 2023
BY: Liban Xasan Cilaahi
SAACAD 08:00 SAXIIX

**Madaxweynaha J. F.S**

**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشعب**
**مكتب الرئيس**

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the Speaker**

**Tix:** XGGSH/ 0238/B11/23:الرقم    **Mogadishu,** Maarso 14, 2023 التاريخ

**Ku:** **Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo:** **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa**

M.ne Madaxweyne;

Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee ***Hindise Sharciyeedka Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa*** oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

***Hindise Sharciyeedka Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa*** wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd ***Nofeembar 23, 2022*** wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG hindisahan ansixiyey ***Febraayo 18, 2023,*** isla ***Febraayo 19, 2023*** waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ku ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka ***Maarso 13, 2023.***

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dstuurka KMG kaaga codsanaynaa in ***Hindise Sharciyeedka Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa*** ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan.

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

Tell: +252 616641550/+252 618153111
E-mail. speaker@parliament.gov.so    Website: www.parliament.gov.so

# BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# GOLAHA SHACABKA

# SHARCIGA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIYADEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS |
|---|
| M.ne Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka BJFS |
|---|
| Marwo Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Golaha Shacabka BJFS |
|---|
| Ku maqan Shaqo |
| M.ne Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow" |

Maarso 14, 2023

Jamhuriyada Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiye ku Xigeenka Koowaad

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب نائب الرئيس الأول

**Federal Republic of Somalia**
**The Upper House**
**Office of The First Deputy Speaker**

**Ref: XGK1/**17/B11/2023 **:الرقم** **Taariikh:** 8/3/23 **:التاريخ**

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:-Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda Aqalka Sare =muqdissho=
Og:- Wasaaradda Maaliyadda X.F.S. =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Laga Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-11/KF2/ /2023** kuna taariikheysan **8 Maarso 2023** kuna ansixiyay Goluhu **Sharciga Laga Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa:**

- Waxaa codeeyay **29 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **29 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **0 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin,

**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**
**Ku Xigeenka 1[aad] Ahna Kusimaha**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 13-3-2023
TIX: 59
SAXIIX:
GELID

# ANSIXINTA SHARCIGA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIYADEEDKA KHAYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

| Senatarrada Codeeya | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 29 | 29 | 0 | 0 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cali Shacbaan Ibraahim | Taariikh: 8 Mar, 2023 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdullaahi Cali Xirsi | Taariikh: 8 Mar. 2023 |

| Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ahana ku-simaha Xoghayaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Cabdullaahi Xaaji Geedi | Taariikh: 8 Mar, 2023 |

## JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA SHARCIGA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIYADEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

**Muqdisho,**
**8 Maarso, 2023**

**Tix**: GAS/B-11/KF2/ /23
Kalfadhiga 2aad
Kulankiisa 21aad

**Taariikh**: 8 Maarso, 2023

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga "**Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya soona gaaray Golaha Aqalka Sare **21dii Feeberaayo 2023** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.49aad** iyo **Qod.50aad** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61aad (1) (3)** ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Soo jeedinta in Sharciga **Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa** loo ansixiyo sida uu uga soo gudbay Golaha Shacabka ee B.F.S.

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga **Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa.**

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **2$^{aad}$**, kulankiisa **21$^{aad}$**, oo ay soo xaadireen **29 Senatar** (Labaatan yo sagaal Senator).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

### Qod.1$^{aad}$

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Sharciga **Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa** isaga oo aan waxba ka beddelin.

### Qod.2$^{aad}$

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**
**Ku Xigeenka 1$^{aad}$ Ahna Ku simaha**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Aqalka Sare**

**Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda ,Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska.**

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ

لجنة الاقتصاد ، الموازنة العامة ، التجارة ، الصناعات ، الاتصالات والسياحة

**Federal Republic of Somalia**

**The Upper House**

Committee for Economy, Budget, Commerce, Industries, Telecommunication and Tourism

---

**Ref: DMGWID/B-11/112/23** **Taariikh: 08 Maarso, 2023**

Ku: Guddoonka Golaha Aqalka Sare

Ku: Xubnaha Golaha Aqalka Sare

**Ujeeddo: Soo jeedinta Akhrinta warbixinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa**

Mudane Guddoomiye,
Senatorrada sharafta leh,

Hindise-sharciyeedka **"Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa"** wuxuu Golaha Aqalka Sare soo gaaray **21^ka Feb, 2023,** waxayna wasaaradda Maaliyaddu ka hor akhrisay Aqalka Sare **25 Feeberaayo,** iyada oo uu Guddoomiye ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare ahna kusimaha Guddoomiyaha ku wareejiyay isla **25 Feb, 2023** Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Aqalka Sare ee **BFS.**

Guddiga oo kaashanaya Sharciyaqaannada ka hawl gala Waaxda Shuruucda Aqalka Sare wuxuu qodob qodob u dul istaagay uguna dooday hindise-sharciyeedka si waafaqsan habraaca ku xusun faqradda **2^aad** ee qodobka **45^aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Aqalka Sare inta u dhaxaysay **26 Feb-02 Maarso 2023.**

Guddigu wuxuu Hindise-sharciyeedkan akhrintii 2aad ka hor akhriyay Aqalka Sare **6 Marso, 2023,** iyada oo senatorrada sharafta leh ay soo jeediyeen talooyin wax ku ool ah.

Guddigu wuxuu dhegeystay talooyinkii iyo soo jeedinnadii wax ku oolka ahaa oo ay Sanatorradu u soo gudbiyeen Guddiga intii ay socotay akhrintii 2aad.

Waxaan halkan idinkaga soo gudbineynaa soo jeedinnada qaar ka mid senatorrada oo la xariira hindise-sharciyeedka **Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Khayraadka Dhulka Hoostiisa.**

Sida badan doodda sentorradu waxay ku saabsaneed arrimo la xariira wadaagga dheefta ka soo baxda khayraadka iyo in uusan jirin heshiis qeexaya sida loo qeybsanayo khayraadka dalka, sidoo kale senatorrada qaar waxay carrabka ku dhufteen in uusan sharcigani damaanad qaadeyn bedqabka deegaanka kana muuqan sida loola dhaqmayo cidda dhib u geysata deegaanka.

Sharcigani kaliya wuxuu khuseeyaa canshuurta laga qaadayo khayraadka iyo faa'iidada laga helo markii la soo saaro balse wixii ku saabsan qeybsiga khayraadka dalk iyo sida loo soo saarayo waa wax heshiis u baahan iyo in loola laabto sharciyo kale.

**Sentorrada Sharafte leh**

Ugu dambeyn, waxaan idink ka codsaneynaa in aad hindise-sharciyeedkan u aqbshaan sida uu Guddigu uga soo shaqeyay kuna ansixaan sida uu yahay.

**Mahadsanidiin**

**Xubnaha Guddiga**

1. Sen. Cabdi Axmed Dhuxulow (Dhegdheer)
2. Sen. Ibrahim Awgaab Cusmaan
3. Sen. Abdisamed Yuusuf Maxamed
4. Sen. Leyla Axmed Ismaaciil
5. Sen. Farxaan Cali Maxamuud

6. Sen. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole)
7. Sen. Cabdixakiim Macallin Axmed Maalin

______________________________

Sen. Ibrahim Awgaab Cusmaan
guddoomiye ku xigeeenka Guddiga
ahna K/S Guddoomiyaha

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

**Ref: XGGSH/ /B-11/23 :الرقم/**

**Mogadishu, February 19, 2023: التاريخ**

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Madaxweynaha Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
Og: Wasaaradda Maaliyadda.
Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.

**UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIYADEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA**

Mudane Guddoomiye,
Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa, si aad waajibaadkiina uga gudataan Ansixinta Hindise Sharciyeedka Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa. Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan kalfadhigiisa 2aad, kulankiisa 20aad taariikhdu markay ahayd **18/02/2023,** codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

| | |
|---|---|
| **Koramka:** | 150 |
| **Oggol:** | 148 |
| **Diiday:** | 0 |
| **Ka aamustay:** | 2 |

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah.

**Xil. Cabdullaahi Cumar Abshirow**
**Guddoomiyaha Ku Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS**

**Tell: +252 616641550/+252 618153111**
**E-mail.** speaker@parliament.gov.so
**Website:** www.parliament.gov.so

# ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIYADEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

Tirada Xubnaha Codeysay=150;
Oggol: 148;
Diiday: 0;
Ka Aamustay: 2;

| Guddoomiye Ku Xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| Xil. Abdullahi Omar Abshir | Tar: 19/02/2023 |

| Ku Simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka BJFS | |
|---|---|
| M.ne Maxamed Cabdullaahi Cabdi - Ciyow | Tar: 19/02/2023 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

---

**Tixraac:XRW/** 0851 **/12/2022** **Taariikh: 08/12/2022**

Bixid / Exit
10 DEC 2022
XRW

**Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS** **=Muqdisho=**

**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**Ujeeddo: Soo Gudbin Hindise sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa**

**Mudane Guddoomiye,**

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.14.12.22 ee 08/12/2022,** kuna saabsan ansixinta "**Hindise sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa "**Hindise sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa"** si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah, waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta "**Hindise sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa"** maadaama baahi weyn loo qabo meel marintiisa.

**Naga guddooma salaan diirran iyo qaddarin**

Hala badugo
10/12/2022

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA · OFFICE OF THE PRIME MINISTER · XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane Xamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

---

Villa Somalia, Telephone +252-6-19997734 E-mail: ps@opm.gov.so or primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

JAMHUURIYADDA FEDERAALAKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 10-12-2022

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tixraac:XRW/ 0080 /12/2022** **Tariikh: 08/12/2022**

**Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada** **=Muqdisho=**
**Og: Guddoonka Golaha Shacabka JFS** **=Muqdisho=**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**Ujeeddo:-** **Go'aan Gole- Ansixinta "Hindise-sharciyeeka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa"**

Bixid / Exit
10 DEC 2022
XRW

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad xarfaha (a), (b) iyo (c) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad xarfaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.14.12.22 ee 08/12/2022,** kuna saabsan ansixinta "**Hindise-sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda **Hindise-sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa.**

JAMHUURIYADDA FEDERAALAKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 10/12/2022
TIX: 0025
SAXIIX: [signature]

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.14.12.22 ee 08/12/2022**, kuna saabsan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

**Qodobka 2aad**

In **"Hindise-sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hoostiisa"** si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane Xamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

**MOF/OM/679/2022** **November 23, 2022**

**Ku: Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo: Soo Gudbin Sharciyo.**

**Mudane Ra'iisul Wasaare,**

Waxa aan halkan si xushmad iyo qadarin leh kugu soo gudbinaynaa sharcigan hoos ku xusan oo muhiim u ah hannaanka Dawlad Wanaaga iyo Maamulka Khayraadka Dhulka Hoostiisa ah.

**Hindise Sharciyeedka Nidaamka Maaliyadeed ee Khayraadka Dhulka Hootiisa**

Sidaas darteed, Mudane Ra'iisul Wasaare, waxa aan halkan kugu soo gudbinayaa sharciga sare ku xusan, si looga guto waajidaadka Dastuuriga ah; waxa aan kaa codsanayaa in aad fududeyso meel-marinta sharcigan iyo u gudbinta golayaasha sharci dejinta.

Mudane Ra'iisul-Wasaare, Iga Guddoon Salaan Diiran iyo Qaddarin Mudan.

**Mahadsanid,**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTRY OF FINANCE
WASAARADDA MAALIYADDA

**Dr. Cilmi Maxamuud Nuur**
**Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

Ministry of Finance
Corso Somalia Street, Shangaani District Mogadishu, Somalia
P.O. Box 106
Email: minister@mof.gov.so
www.mof.gov.so

# JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA SHACABKA

# HINDISE SHARCIYEEDKA LAGU HAGAYO NIDAAM MAALIYADEEDKA KHEYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
21 FEB 2023
SOO GELID/RECEIVED

Tusmo:

CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD ........ 1
Qodobka 1aad: Magaca iyo Baaxadda Sharcigan ........ 1
Qodobka 2aad: Erey-bixin ........ 1
Qodobka 3aad: Cidda Sharcigani Ku Waajibay ........ 3
Qodobka 4aad: Cashuuraha uu Nidaaminayo Sharcigani ........ 3

CUTUBKA 2AAD: BATROOLKA ........ 4
Qodobka 5aad: Waajibinta Xuquuqda Lahaanshaha Khayraadka ........ 4
Qodobka 6aad: Meelmarinta Cashuurta Macaashka ........ 4
Qodobka 7aad: Howlaha Batroolka ee Kala Soocan ........ 5
Qodobka 8aad: Dakhliga La Cashuuri Karo Iyo Khasaaraha Laga Goyn Karo ........ 5
Qodobka 9aad: Dakhliga Ka Soo Baxa Deegaanada Kala Duwan ee Hawlaha Batroolka ........ 6
Qodobka 10aad: Kharashaadka Laga Goyn Karo Dakhliga ........ 6
Qodobka 11aad: Kharashaadka Aan Laga Goyn Karin ........ 7
Qodobka 12aad: Xisaabaadka ........ 8
Qodobka 13aad: Kala Wareejinta Xuquuqaha Batroolka ee Toosan Iyo Kuwa Dadban ........ 8
Qodobka 14aad: Sanduuqa Loo Qoondeeyey Dayactirka Deegaanka ........ 9

CUTUBKA 3AAD: MACDANTA ........ 9
Qodobka 15aad: Waajibinta Xuquuqda Lahaanshaha Kheyraadka ........ 9
Qodobka 16aad: Meelmarinta Cashuurta Macaashka Shirkadaha ........ 10
Qodobka 17aad: Hawlaha Macdanta ee Kala Soocan ........ 10
Qodobka 18aad: Dakhliga La Cashuuri Karo Iyo Khasaaraha Laga Goyn Karo ........ 11
Qodobka 19aad: Dakhliga Ka Soo Baxa Deegaannada Kala Duwan Ee Hawlaha Macdan Qodista 11
Qodobka 20aad: Kharashaadka Laga Goyn Karo Dakhliga ........ 12
Qodobka 21aad: Kharashaadka Aan Laga Goyn Karin ........ 13
Qodobka 22aad: Xisaabaadka ........ 13
Qodobka 23aad: Kala Wareejinta Xuquuqaha Macdanta Ee Toosan Iyo Kuwa Dadban ........ 14
Qodobka 24aad: Sanduuqa Loo Qoondeeyey Dayactirka Deegaanka ........ 14

CUTUBKA 4AAD: HEESHIISYADA QODISTA KHAYRAADKA DHULKA HOOSTIISA ........ 15
Qodobka 25aad: Dhowrista Heshiisyada Qodista Khayraadka Dhulka Hoostiisa ........ 15
Qodobka 26aad: Xuquuq Maaliyadeedka Lagu Heshiiyey Ee Aan Is Bedelin ........ 15
Qodobka 27aad: Cashuur Dhaafka Ay Samaynayaan Dawladda Federaalka, Dawlad Goboleedyada Iyo Dowladaha Hoose ........ 16

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA · GOLAHA SHACABKA · HOUSE OF THE PEOPLE

Qodobka 28aad: Dhammaan Heshiisyada Qodista Khayraadka Dhulka Hoostiisa Looma Ogola Laba-Jeer Faa'iid ........ 16

CUTUBKA 5AAD: MAAMULKA IYO MAARAYNTA ........ 17

Qodobka 29aad: Xisaabaadka, Qiimaynta iyo Bixinta Cashuuraha ........ 17

Qodobka 30aad: Cashuur Celinta Iyo Bixinta Xuquuqda Lahaanshaha Khayraadka ........ 17

Qodobka 31aad: Qiyaasta, Cashuur Celinta Iyo Bixinta Cashuurta Macaashka Shirkadaha ........ 18

Qodobka 32aad: Xiriirka Uu Sharcigani La Leeyahay Sharciga Maamulka Dakhliga ........ 18

Qodobka 33aad: Wada Shaqaynta Hay'addaha Dawladda ........ 19

Qodobka 34aad: Saadaasha Maaliyadeed ........ 19

CUTUBKA 6AAD: Burin iyo Dhaqangal ........ 20

Qodobka 35aad: Burin ........ 20

Qodobka 36aad: Dhaqangalka Sharcigan ........ 20

JADWALKA 1AAD: BATROOLKA ........ 21

Qaybta I: Xuquuqda Lahaansha Khayraadka ........ 21

QAYBTA II: CASHUURTA MACAASHKA ........ 21

Jadwalka 2aad: Macdanta ........ 22

Qaybta I: Xuquuqda lahaanshaha macdanta ........ 22

Qaybta II: Cashuurta Macaashka ........ 23

Jadwalka 3aad: Sharciyada Cashuuraha Macaashka ........ 23

## CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad: Magaca iyo Baaxadda Sharcigan

1) Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Lagu Hagayo Nidaam Maaliyadeedka Kheyraadka Dhulka Hoostiisa.
2) Sharcigani wuxuu nidaaminayaa arrimaha maaliyadeed iyo cashuureed ee la xiriira soo saarista iyo ka faa'iidaysiga khayraadka Batroolka iyo Macdanta si waafaqsan Sharciga Batroolka Lr.19 ee Febraayo 8, 2020[ka] iyo Sharciga Macdanta Lr. 7 ee Janaayo 9, 1984[ka].
3) Sharcigani wuxuu faahfaahinayaa arrimo cashuureed u gaar ah cidda ka shaqaynaya qodista khayraadka dhulka hoostiisa.

### Qodobka 2aad: Erey-bixin

Erayada soo socda, haddii aan Sharcigan gudihiisa si kale loogu fasirin, waxaa loola jeedaa eray kasta fasiraadda ku hor qoran:

1) "Xaddiga kaasoo galey" Waxaa loola jeedaa caddadka iyo xaddiga ama faa'iido, dayn dhaaf, adeegyo ay isu qabanayaan, isticmaal hanti maguuraan kasta oo qof qof kale u gudbiyo, ha ahaato lacag ay isu wareejiyeen ama hanti, ka jarista waajibtaadka cashuur, tayada adeegyada, isticmaalka lacagta, isticmaalka hantida ama wixii kale ee adeeg ah. Iyadoo lagu qiimeeyey laguna jaan gooyey qiimaha suuqa.
2) "Sanduuqa dayactirka deegaanka" Waxaa loolaa jeedaa sanduuqa loo abuuray in uu daboolo ama lagu bixiyo kharashaadka ku baxaya marka laga guurayo goobta wax laga qodayey, dayactirka goobta la deganaa iyo hawlaha ku baxaya rarista. Lacagta loo qoondeeyey sanduuqa waa lacag ka madax bannaan hawlaha qodista khayraadka. Wasaaradda Batroolka ayaa mas'uul ka ah hawlahaas.
3) "Cidda ay isku xiranyihiin" waxaa loola jeedaa Labo qof ama shirkado oo uu ka dhaxeeyo xariir qaraabo, shuraako ganacsi, iyo xariir laga fahmi karo daneysi.
4) "Aagga qandaraaska" waxaa loola jeedaa goobta oggolaanshaha heshiis wax-soo-saar wadaag lagu bixiyey.
5) "Qiimaha" waxaa loola jeedaa hantida kharashaadka ku baxay dhismaha, kharashaadka warshadeynta, kharashaadka soo saarista hantida, kharashaadka dayactirka, kharashaadka wax-ka-beddelka, kharashaadka rakibitaan, kharashaadka iibinta iyo kharashaadka la xariira helida ama iibinta hantidaas.
6) "Saliidda Ceyriin" waxaa loola jeedaa macdan saliid ah oo aan la sifeyn iyo dhammaan haydar-karboonnada (Hydro Carbon) dareera ama laga miiray gaaska dabiiciga ah.
7) "Barta laga dirayo ama laga rarayo" waxaa loola jeedaa meesha lagu uruuriyo ama laga daabulayo batroolka.
8) "Aagga qodista iyo horumarinta" waxaa loola jeedaa aagga dhuleed/badeed ee loo qoondeeyey in laga qodo lagana hormariyo batroolka ama macdanta, sida uu dhigayo heshiiska wadaagga wax-soo-saarka.
9) "Kala wareejin" waxaa loola jeedaa hantida la iibiyey, la beddeshay ama qayb wareejisay.
10) "Aagga uu koobayo sharciga ogolaanshaha qodista khayraadka" waxaa loola jeedaa goobta qandaraaslaha loogu oggolaaday inuu ka baaro kheyraadka dabiiciga.
11) "Sahaminta" waxaa loola jeedaa baadigoob kheyraadka dabiiciga.
12) "Qodista wixii laga helay" waxaa loola jeedaa macdanta lagu helay baadigoobta ama sahminta.
13) "Halka laga soo saarayo" waxaa loola jeedaa goobta macdanta loo asteeyey in laga soo saaro ama laga qodo.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC

14) "Heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa" waxaa loola jeedaa heshiiska wax-soo-saarka wadaagga ee batroolka/macdanta oo ay dawladdu bixisay.
15) "Hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa" waxaa loola jeedaa hawlaha la xiriira batrool qodista iyo hawlaha macdan qodista.
16) "Shatiga qodista khayraadka dhulka hoostiisu" waa oggolaanshaha (shati) loo bixiyey batroolka iyo shatiga macdan qodista.
17) "Heshiiska iibinta" waxaa loola jeedaa shirkad heysata shatiga qodista khayraadka dhulka hoostiisa in shirkad kale ay ka iibin karto shatigaas iyado oo ay ku beddelan karto lacag cad iyo waxii la halmaala.
18) "Financial instrument" waxaa loola jeedaa kharashka la halmaala dulsaarka iyo waxyaabaha kale sida ku qeexan Sharciga Caalamiga ah ee xogta maaliyadda (International Financial Reporting Standards).
19) "Aagga shatiga/Liisanka " waxaa loola jeedaa goobta shatiga heshiis wax-soo-saar wadaag lagu bixiyey.
20) "Xuquuqda macdanta" waxaa loola jeedaa oggolaanshaha (shati) loo bixiyey macdanta iyo shatiga qodista macdan.
21) "Hawlaha macdanta" waxaa loola jeedaa qodista iyo sahminta macdanta la rajaynayo.
22) "Macdanta" waxaa loola jeedaa macdanta dabiiciga ah ee lala soo bixi karo sida dhagaxda qiimaha leh oo loo adeegsan karo warshadeynta, wax-soo-saarka beeraha iyo waxii lamid ah.
23) "Shatiga macdan qodista" waxaa loola jeedaa shatiga lagu bixiyey heshiiska wax-soo-saar wadaaga macdanta.
24) "Qodista macdanta" waxaa loola jeedaa soo saarista macdanta.
25) "Gaaska dabiiciga ah" waxaa loola jeedaa dhamaan hydrocanbon-nada gaaska ah iyo kuwa aan falgelin, oo ay ka mid yihiin gaaska qoyan, gaaska qalalan, gaaska ka koreeya saliidda iyo midka ka hara, kadib marka hydrocarbon-ka dareera laga saaro gaaska qoyan, oo aan ahayn saliidda ceyriin.
26) "Xuquuda Lahaanshaha ee mudnaanta leh" waxaa loola jeedaa lacag bixinta mudaysan (tusaale ahaan sanadkiiba mar) oo la xiriirta xuquuq lasocota lahaanshaha kheyraadka dhulka hoostiisa, laakiin qodobadaan 4 iyo 14 ma khuseeyaan.
27) "Batroolka" waxaa loola jeedaa hydrocarbon kasta oo iskiisa u sameysmay, halahaado qaab gaas, dareere ama adke.
28) "Hawlaha Batroolka" waxaa loola jeedaa hawl looga danleeyahay in lagu sahmiyo batroolka lagu baarro, hormariyo, soo saaro, iibiyo ama lagu dhoofiyo batrool iyo in lagu dhiso, lagu taago, lagu hawlgeliyo dhismooyin, kaabayaal iyo xarumo loo adeegsanayo horumarinta, wax-soo-saarka iyo dhoofinta batroolka ama dib u habeynta ama kala furfurista dhismo kasta oo kamid ah kaabayaashaas ama xarumahaas.
29) "Xuquuqda Batroolka" waxaa loola jeedaa qaybta uu xaqa u leeyahay qandaraaslaha ku jira heshiiska wadaagga wax-soo-saarka.
30) "Lacagta soo xerootey" waxaa loola jeedaa lacagaha laga helay hantida la iibiyey.
31) "Habka shaqada" waxaa loola jeedaa xeer nidaamiye lagu qeexi doono qaabka shaqo wadaagga ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Batroolka & Macdanta.
32) "Heshiiska wax-soo-saarka wadaag" waxaa loola jeedaa heshiis la galay ama la bixiyey, kasoo qandaraasluhu ku helayo saami kamid ah shidaalka lagu soo saaro hawlaha batroolka, saamigaas oo loogu beddelayo hawlihii uu qabtay.
33) "Rajayn" waxaa loola jeeda waxa la filaayo in la heli karo oo la xariira macdanta.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

34) "Hay'adda korjoogteynta batroolka" waxaa loola jeedaa Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.
35) "Deganaansho" waxaa loola jeedaa shirkad laga abuuray gudaha Dalka Soomaaliya ama sanadka cashuureedka gudihiisa maamulka shirkadu ay dagan yihiin Soomaaliya.
36) "Hay'adda Maamulka Dakhliga" Waxaa loola jeeda Wasaaradda Maaliyadda ee masuulka ka ah arrimaha Dakhliga.
37) "Sharciga dakhliga" waxaa loola jeeda Sharciga Maamulka Dakhliga.
38) "Aagagga kala duwan ee hawlaha macdan qodista" waxaa loola jeeda shaqooyinka wax-soo-saarka macdaneyd ee ka socda goobaha kala duwan in aagga weliba loo xisaabinayo gaarkiisa.
39) "Aagagga kala duwan ee hawlaha batroolka" waxaa loola jeeda shaqooyinka wax-soo-saarka batroolka ee ka socda goobaha kala duwan in aagga weliba loo xisaabinayo gaarkiisa.
40) "Eexasho" waa isfaham u dhaxeeya dad wax kala iibsada si aan waafaqsaneyn qiimaha suuqa (Transfer pricing rules).
41) "Milkiyadda lahaanshaha" waxaa loola jeedaa lahaanshaha tooska ah iyo midka dadbanba.
42) " Qiimeynta sanadle ee Rasamaalka" waxaa loola jeedaa qiimaha lagu soo iibsaday oo laga jaray qoondaymaha hay'addaha cashuuraadku u qoondeeyeen in xaquuqda laga gooyo si loo dhawro cadaalad ahaanshaha cashuurta lagu waajibiyey.
43) "Qiimaynta sanadle" waxaa loola jeedaa Sannad Cashuureedka.
44) "Wiqiyad (Ounce)" waxaa loola jeedaa halbeegga lagu cabiro macdanta iyo waxii lamid ah oo u dhiganta 28 gram.

## Qodobka 3aad: Cidda Sharcigani Ku Waajibay

1) Sharcigani waxaa lagu fulinayaa cid kasta oo fulinaysa hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa ee ruqsad haysta ama aan haysan.
2) Si looga hortago in la baalmaro Sharcigan, Wasaaradda Maaliyadda, iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta, waxay soo saari kartaa xeer-nidaamiyeyaal lagu ballaarinayo xadka Sharcigaan si loogu dabaqo qandaraas-hoosaadleyaalka ka shaqaynaya hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa. Marka la soo saarayo xeer-nidaamiyeyaalka ku xusan faqradda 2aad ee Qodobkan, Wasaaradu waxay tixgelinaysaa arrimaha soo socda:
    a) Haddii qandaraas hoosaadluhu uu yahay mid la shirkoobay/bahwadaag ganacsi la ah cidda fulinaysa hawlaha qodista khayraada dhulka hoostiisa;
    b) Haddii qandaraas hoosaadluhu yahay rukhsadle idman kaasi oo u xilsaaran fulinta howlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa.
    c) Haddii qandaraas hoosaadluhu samaynayo hawlgallo muhiim ama kaabayaal u ah shaqada qodista khayraadka dhulka hoostiisa;
    d) Heerka qandaraaas hoosaadluhu ku leeyahay howlaha soo saarista batroolka ama macaashka ka soo gelaya fulinta howlaha batroolka marka lala barbardhigo dhigiisa; iyo
    e) Haddii ujeeddada ugu weyn ee xiriirka ka dhaxeeya qandaraaslaha iyo qandaraas hoosaadleyaalka tahay in lagu yareeyo ama looga baaqsado bixinta cashuur ku waajibi lahayd si waafaqsan sharcigan.

## Qodobka 4aad: Cashuuraha uu Nidaaminayo Sharcigani

1) Cutubka 2aad iyo Cutubka 3aad ee sharcigaani waxay jidaynayaan xuquuqda lahaanshaha khayraadka laga qodo dhulka hoostiisa iyo cashuurta macaashka shirkadaha ku hawlan

qodista khayraadka dhulka hoostiisa, iyadoo qaybta sharci ee 5aad ay nidaaminayso maamulka cashuurahaas.

2) Cutubka 4aad ee sharcigan wuxuu nidaaminayaa xaddiga cashuuraha ee ku cad heshiisyada qodista khayraadka dhulka hoostiisa, Cutubka 4aad waxay caddaynaysaa dhammaan cashuuraha oo ay ku jiraan furdooyinka, cashuuraha wax-soo-saarka, cashuurta macaashka shirkadaha, lahaanshaha xuquuqda khayraadka, cashuurta iibka iyo cashuuraha Maamul Goboleedyada, Gobalka Banaadir iyo Degmooyinka.

## CUTUBKA 2AAD: BATROOLKA

### Qodobka 5aad: Waajibinta Xuquuqda Lahaanshaha Khayraadka

1) Cid kasta oo haysta xuquuqaha batroolka waxaa ku waajibay in uu bixiyo xuquuqda lahaanshaha khayraadka ka hor celinta kharashka iyo wadaagga fa'iidada
2) Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxaa loo xisaabinayaa xaddiga lagu asteeyey sida ku cad Jadwalka 1aad Faqradaha 1aad iyo 2aad.
3) Batroolka la soo saaray waxaa lagu cabirayaa: -
   a) Barta cabirka sida ku cad heshiiska wadaagga wax-soo-saarka ee khuseeya; ama
   b) Barta ay go'aaminayso Wasaaradda Batroolka haddii aan lagu caddayn heshiiska wax-soo-saar wadaagga.
4) Xaddiga batroolka lagu cabiray faqradda 3aad ee kor ku xusan, waxaa laga jarayaa wasakhda laga saaray batroolka.
5) Xuquuqda lahaanshaha ma waajibayso xaaladaha soo socda:
   a) Batroolka lagu celiyay ceelka kadib oggolaanshaha Wasaaradda. Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxay waajibaysaa bixinteedu marka laga soo saaro ceelka.
   b) Muunadaha laga qaado batroolka la soo saaray si loo taxliiliyo, tijaabiyo ama loo baaro. Haddii la iibiyo muunadahaasi waxaa ku waajibaya bixinta xuquuqda lahaanshaha khayraadka.
   c) Batroolka ay ogolaatay Wasaaradda Batroolka si loogu isticmaalo:
      i. Qiiq ama wixii kale ee sun ah ama dhib dhalinaya ee xiriir la leh hawlaha batroolka; ama
      ii. Wax si toos ah loogu isticmaalay isla hawlaha soo saarista batroolka.
6) Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxaa la bixinayaa wakhtiga iyo qaabka loogu caddeeyey Cutubka 5-aad.

### Qodobka 6aad: Meelmarinta Cashuurta Macaashka

1) Cidda ka shaqaynaya hawlaha batroolka waxaa ku waajibaya cashuurta macaashka siduu dhigayo (Sharci Lr. 5 ee soo baxay 5 Noofeembar 1966ka).
2) Cashuurta macaashka laga qaadayo cidda ku hawlan shaqada batroolka waxaa loo xisaabinayaa, laguna cashuurayaa sida uu sharcigaani dhigaayo. Xeerarka iyo xadidaadda ka duwan sharcigaan ee ku jira sharciga lagu xusay faqradda 1-aad laguma dabakhi karo.
3) Cashuurta macaashka ee laga qaadi karo dadka ku lugta leh hawlaha aan ahayn batroolka waxaa lagu xisaabinaya, laguna cashruurayaa Sharciga cashuurta macaashka shirkadaha. (Sharci Lr. 5 ee soo baxay 5 Noofeembar 1966ka).
4) Waa in la kala xisaabiyaa dakhliga ka soo xerooda iyo kharashaadka ku baxa hawlaha batroolka iyo kuwa aan batroolka ahayn ee shirkadda, si aan xisaab looga tegin.
5) Qiimaynta cashuurta sanadlaha shirkadda ku hawlan soo saarista batroolka waxaa lagu xisaabinayaa sida ku xusan faqradda 3aad ee jadwalka 1aad.

6) Xisaabinta cashuurta ku waajibaysa dakhliga shirkadda waxaa lagu salaynayaa dakhliga ka soo xarooda goobta ama ceelka laga soo saarayo batroolka ee ku wada yaalla hal xirmo. Xisaabinta ku saabsan khasaaraha ka go'aya dakhliga la cashuurayo waxaa loo raacayaa sida ku xusan Qodobka 7aad ee Sharcigan.
7) Marka la xisaabinayo cashuurta ku waajibtay dakhliga ka soo xerooda hawlaha batroolka waxaa loo xisaabinayaa sida soo socota:
    a) Goob ama ceel kasta waxaa loo tixgelinayaa inuu ka madax-bannaan yahay goobaha ama ceelasha kale oo ay ku wada yaallaan hal xirmo gudaheed, waxaana ku waajibaya cidda in ay diyaariso xisaabaadkiisa gaarka ah;
    b) qofka wuxuu xisaabanayaa dakhliga guud ee ka soo xarooday goobta ama ceelka, khasaaraha iyo cashuurta ku waajibtay goobtaas ama ceelkaas sanadkaasi.
8) Cidda agab ama qalab u adeegsada ceelal ama goobo kala duwan, waxaa loola dhaqmayaa in agabkaasi ama qalabkiisa uu iska iibiyay ama soo iibsaday xataa haddii lahaanshaha agabka ama qalabka uu qofku wareejiyay milkiyaddiisa uusan ka wareegin.
9) Haddii laba daraf ama ka badan ay ku shirkoobaan haysashada xuquuqda xirmo batrool, waxaa loo xisaabinaya mid kasta gaarkiisa.
10) Macaashka ka Dhasha kala iibsiga xuquuqda lahaansho ee xirma batrool waxaa lagu cashuurayaa 20%.
11) Qodobbada ku saabsan Isu-eexashada beec aan waafaqaysanayn beeca suuqa ayaa ku dhaqangalaya ganacsiga dhexmaray shirkado ganacsi wadaag ah:
    a) kuwaas oo ka fulinaya howlo batrool soo saaris goob, ceel ama sifeyn batrool la soo saaray iyo wixii kale oo howlo la xiriira ah; ama
    b) Macaamilka u dhaxeeya labo daraf iyo ka badan oo isla leh xuquuq batrool.

## Qodobka 7aad: Howlaha Batroolka ee Kala Soocan

1) Howlaha batroolka ee khuseeya fulinta heshiis batrool waxaa loola dhaqmayaa in ay tahay mid gaar u taagan.
2) Marka goob kamid ah xirmo si gaar ah loogu asteeyo in laga soo saaro batrool:
    a) Howlaha batroolka ee laga fuliyay xirmada ka hor astaynta goob ka mid xirmada si looga soo saaro batrool iyo howlaha batroolka ee laga fuliyay goobtii la asteeyay kadib astaynta waxaa loo txigelinayaa in yihiin howl batrool laga fuliyay goob si gaar ah u astaysan.
    b) Haddii ay jiraan howlo batrool oo laga fulinayo isla xirmada balse ka baxsan goob horay si gaar ah loogu asteeyay in laga soo saaro batrool waxaa loola dhaqmayaa aag cusub.
3) Haddii ay shirkaddu ka baxdo ama celiso qayb ka mid ah xirmada isla markaasina laga fuliyay howl batrool kadib astaynta goob laga soo saarayo batrool; waxaa howlahaasi batrool loo qaddarinayaa in laga fuliyay goobta loo asteeyay in laga soo saaro batrool.
4) Wasaaradda Maaliydda oo masuul ka ah dakhliga, iyadoo la kaashanaya Wasaaradda ka masuulka ka ah arrimaha batroolka, waxay dejinayaa xeer-nidaamiyeyaal khuseeya
    a) Qeexidda ama cadaynaya howlaha batrool ee kala soocan; iyo
    b) Sida loo maareynayo Xirmooyinka deriska ah iyo mideynta xirmooyin. Kala xadaynta iyo isku dhafka xuquuqaha batroolka.

## Qodobka 8aad: Dakhliga La Cashuuri Karo Iyo Khasaaraha Laga Goyn Karo

1) Cashuurta ku waajibta dakhliga ka soo xarooda goob ama ceel sanadkiiba waxaa loo xisaabinayaa dakhliga soo xarooday oo laga jaray isugeynta kuwa soo socda:

a) Kharashaadka sanadka ku baxay howlaha batroolka ee sanadkaas; iyo
b) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee la xiriira fulinta howlaha batroolka kuwaas oo xisaabtood laga soo guuriyay sanadihii la soo dhaafay.

2) Marka laga jarayo kharashaadka iyo khasaaraha dakhliga ka soo xarooday howlaha batroolka ee ku sheegan faqradda 1aad, waxaa marka ugu horraysa dakhliga laga jarayaa kharashaadka kadibna khasaaraha.
3) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee laga jarayo dakhliga kuna sheegan faqradda 1aad, xarafka (b) waa kharashaadka ku baxay goob ama ceel shidaal sanadkaas kuwaas oo ka bata dakhliga soo xarooday sanadkaas.
4) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee laga jarayo dakhliga kaasi oo laga guurinayo sanadihii la soo dhaafay wuxuu socon karaa muddooyinka hoose hadba tii soo horraysa:
   a) Haddii la wada bixiyo sanadkii la galay sida ku xusan faqradda 1aad, xarafka (b) ee qodobkan;
   b) muddo afar iyo toban (14) sano oo ka billaabanaysa marka la ogaado in khasaaraha la galay; ama
   c) Ilaa heshiiska wax-soo-saar wadaaggu dhammaanayo.
5) Waxaa reebban in khasaaro horay loo soo xisaabiyay lagana jaray dakhli in mar labaad laga jaro dakhli kale oo ka xarooday goob ama ceel shidaal.
6) Goob ama ceel kasta waxaa laga jarayaa keliya khasaarihiisa. Waxaa reebban in khasaaro khuseeya goob ama ceel shidaal laga jaro goob ama ceel kale oo shidaal ama dakhli ka yimaada howl aanan khuseyn howlaha batroolka.
7) Khasaaro ka yimaada howlo aanan khuseyn howlaha batroolka lagama jari karo dakhliga ka yimaada howlaha batroolka.

## Qodobka 9aad: Dakhliga Ka Soo Baxa Deegaanada Kala Duwan ee Hawlaha Batroolka

1) Dakhli sanadeedka ee ka yimaada goob ama ceel shidaal waa isugeynta guud dakhliyada soo socda oo aan laga goyn kharash iyo khasaaro:
   a) Dakhliga guud oo ah isugeynta kharashka loo celiyay iyo faa'iidada batroolka ee ku soo aadda shirkad kana soo xarooda batroolkii la soo saaray laguna iibiyay qiimaha suuqa si waafaqsan qodobka 4aad faqradiisa 2aad ee jadwadlka 1aad
   b) Wixii dakhliga ka soo xarooda gedista hanti, ha ahaato mid guurto ama ma guurto ah oo ay ku jirto kala wareejinta xuquuqda batroolka, sida ku cad faqradda 4aad ee jadwalka 1aad.
   c) Dakhliga ka soo xerooday sanadkaasi bixinta adeegyo, xoggo ama agabyo lagu fulinayo howl batrool;
   d) Dakhli ka soo xerooday magdhow iyo lacagaha caymiska oo la xariira hawlaha qodista batroolka;
   e) Lacagta ku hartay sanduuqa dayactirka deegaanka aagga shidaalka, sida lagu cadeeyey Qodobka 13aad.
2) Dakhliga laga helo Aaladaha maaliyadeed sida dulsaarka raasamaalka iyo wixii la hal maala laguma darayo dakhliga ka soo xarooda goob ama ceel shidaal.

## Qodobka 10aad: Kharashaadka Laga Goyn Karo Dakhliga

1) Kharashaadka ku sheeggan faqradda 2aad ee Qodobkaan waxaa laga jarayaa dakhliga sanadlaha ah ee ka soo xarooda goob ama ceel shidaal iyadoo la qaddarinayo shuruudaha soo socda:

a) In kharashka la galay sanadkaasi uuna si toos ah u khuseeyo howlaha batroolka;
b) Kharashkaasi yahay mid dib loogu celin karo shirkadda si waafaqsan heshiiska wax-soo-saar wadaagga; iyo
c) Kharash kasta oo aan lagu diidin Qodobka 10aad ee sharcigaan.

2) Kharashaadku waa:
a) Lacagaha la siiyey dawladda oo ay ku jiraan khidmad, xaquuqda lahaanshaha iyo cashuuraha aan ahayn macaashka;
b) Qiimaha ku baxay shaqada iyo hawlaha la qoondeeyey oo ay ka mid yihiin mushaaraadka oo ay ku jiraan gunnada shaqaalaha dawladda, qoondooyinka dib u dejinta shaqaalaha, daaweynta iyo caymiska nolosha iyo dakhliyada qofku jeebkiisa ka bixiyey ee dib loogu celinayo.
c) Qiimaha lagu soo iibiyey agabka, qalabka iyo sahayda;
d) Kharashka ku baxaya gaadiidka iyo shaqaalaha, qalabka, agabka iyo sahayda;
e) Karashaadka ku baxay adeegyada loo bahan yahay sida; korontada, biyaha, kharashaadka taleefonada oo ay fulinayaan gacan saddexaad oo laga soo iibsaday, waxaana ka mid ah qiimaynta kharashka, gudbinta xogta, sumadayn, sahanka, kormeerka iyo talooyinka la xiriira dhulka, injineernimada, kimisteriga, waxyeelada deegaanka, xisaabaadka, xisaab xirka, sharciga, maamulka shaqaalaha, qandaraasyada iyo alaabta lasoo iibsaday
f) Qarashaadka guud ee ku baxaya maamulka, waa inuusan ka badan karin 1% kharash sanadeedka qaybaha kale;
g) kharashaadka caymiska, dayactirka, bedellaadda ama bakhaarada lagu kaydinayo qalabka iyo sahayda;
h) Qoondooyinka loo meel mariyey in meel loo dhigo sanduuqa dayactirka deegaanka ee aagga laga qodayo batroolka;
i) Kharashka dheeriga ka noqda marka la isticmaalay qoondooyinka loo meel mariyey sanduuqa dayactirka deegaanka laga qodayo batroolka;
j) Qoondada dhiirigelinta Maalgashiga sanadle ee la ogolaaday iyadoo la tix gelinayo xuquuqda batroolka ee ku habboon sida ku xusan faqrada 4aad ee Jadwalka 1aad; iyo
k) Kharashaadka kale ee lagama maarmaanka ah ee lagu bixiyey aagagga la kala soocay ee hawlaha shidaalka.

3) Kharashaad kasta ha ahaado mid rasaamaaliya ama aanan ahayn waa laga jarayaa.

## Qodobka 11aad: Kharashaadka Aan Laga Goyn Karin

Wax yaabahan soo socda ma noqon karaan kharashaad laga jari karo:

1) Kharashka Qiime dhaca ku yimaadda qalabka;
2) Kharashka lagu iibsaday xuquuqda batroolka oo ay ku jiraan qiimaha rasmiga ah ee lagula kala wareegay, lagu kala iibsaday, khasaarihii ka dhashay kala iibsiga iyo khidmooyinkii lagu bixiyey qareennada iyo wixii dheeraad ah ee lagu bixiyey xuquuqaha kala duwan ee batroolka, laakiin qodobadaani ma quseeyaan waxa uu cadaynayo Qodobka 9aad farqadiisa 2aad (j) ee Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha;
3) Kharashka dulsaarka raasamaalka iyo wixii la hal maala sida ku cad sharciga caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
4) Xaquuqda lahaanshaha;
5) Kharashaaadka lagu iibsado qayb ka mid ah xuquuq batrool;
6) Kharash kasta oo ka badnaada xadka uu dhigay qodobka 11aad farqadiisa 5aad; iyo

7) Xaddiga lagu caddeeyey faqradda 2aad ee Jadwalka 3aad.
8) Lacagaha shirkaduhu bixiyeen markay ku guulaysteen qandaraaska (Gunnada heshiis saxiixidda).

## Qodobka 12aad: Xisaabaadka

1) Haddii aan si kale loogu cadayn sharcigaan, qadar-lacageedka lagu darayo ama laga goynaayo marka la xisaabinaayo dakhliga la cashuuri karo ee aagagga lakala saaray ee hawlaha batroolka waa in uu noqdo:
    a) Mid lagu xisaabiyo qaab xisaabeed waafaqsan Sharciga Caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
    b) Mid dib loogu sixi karo wixii khaladaad xisaabeed ah ee soo baxa.
2) Faqradda 1aad laguma maamulayo dakhliga ka soo baxa batroolka soo baxay.
3) Cadadka lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga la qaadi karo iyo hantida loo isticmaalay xaqiijinta dakhliga waa in loo qoondeeyaa si sax ah oo ah sidaan soo socota:
    a) Wax ka badan hal aag oo aagagga la kala saaray ee hawlaha batroolka; ama
    b) Hawlaha lagu fulinayo batroolka iyo adeegyada kale ee aan batroolka ahayn. Gaar ahaan, Haddii batroolka lagu iibiyey qiime ka badan qiimaha suuqa, sida lagu cadeeyey faqradda 2aa ee Jadwalka 1aad, wixii dheeri ku ah qiimaha waxaa loo kala qaybinayaa hawlaha batroolka iyo hawlaha aan batroolka ahayn, waana la cashuurayaa iyadoo qayb ka ah dakhliga la soo dallacayo ee howlahaas.
4) Marka la xisaabinayo cashuuraadka iyo dakhliga hawlaha batroolka waxaa lagu darayaa wixii ka soo baxa habka kala iibsiga laba shirkadood oo is leh oo aan waafaqsanayn qiimaha suuqa, haddii uu yahay dakhli iyo hadduu yahay qarash, sida lagu cadeeyey faqradda 3aad.
5) Haddii laba daraf/Shirkadood oo Isku dan oo kawada shaqaynaya laba aag oo hawlaha batroolka ah ay kala iibsadaan hanti, khidmad iyo adeegyo kale oo ay isa siiyaan wixii macaash ah ee dhexdooda ay kala helaan looma xisaabinayo cashuur ahaan.
6) Ujeedada faqradda 5aad waa; mamnuucidda eexda dhexmarta laba shirkadood oo isleh oo ka wada shaqaynaya aagga batrool (iyagoo ka baxsanaya ama dhimaya cashuurta dawladda).

## Qodobka 13aad: Kala Wareejinta Xuquuqaha Batroolka ee Toosan Iyo Kuwa Dadban

1) Marka la go'aaminayo qiimaha lagu kala iibsanayo xuquuqaha waxaa ku jira gadistii, iyadoo uu la socdo xuquuqdii lahaanshuhu, taasoo ah:
    a) Cadadka hadda la kala qaatay iyo kuwa lagu balamay in la kala qaadan doono ayaa la xisaabinayaa; iyo
    b) Cadadka la kala qaadan doono ee lagu balamay wax ka badan hal sano oo mustaqbalka ah, cadadkaas waxaa lagu qiimaynayaa qiimaha ay markaas suuqa ka joogaan saamiyada wax lagu kala gatay, iyadoo la isticmaalayo habraaca ku haboon.
2) Cadadka lagu go'aamiyey faqradda 1aad waxaa loola dhaqmayaa qayb ka mid ah qiimaha lagu bixiyey iibsashada iyo helitaanka xuquuqda batroolka.
3) Haddii shirkad haysata xuquuqda batroolka ay gaddo 25 boqolkiiba ama ka badan, isbeddelka ku yimaada lahaanshaheeda aasaasiga ah ee hay'adda waxaa loola dhaqmayaa sidii inay saamiyada xuquuqdeeda batrool aanay is beddelin.
4) Marka lagu dhaqmayo faqrad 3aad shirkadda waxaa loola dhaqmayaa sidan;
    a) In ay shirkaddu qiimahay ku gadday uusan bedelayn saamigeedii rasmiga ahaa ee boqolayda, iyo

b) Kharashaadka ay shirkaddu bixisay isaguna ma bedelayo boqolayda saamiga hantiyadeed ee shirkadda.

5) Shirkad ujeedkeedu yahay inay beddesho saamigeedii sida lagu cadeeyey faqradda 3aad, waa in ay faahfaahin dheeraad ah siisaa Wasaaradda Maaliyadda ee masuulka ka ah arrimaha Dakhliga isbeddelkaas 30 maalmood gudahood xilligay isbedelka samaynayso.

6) Shirkadii ku guuldaraysata inay wargeliso Wasaaradda Maaliyadda ee masuulka ka ah arrimaha Dakhliga mudadaan 30 maalmood ah waxaa lagu ganaaxayaa ciqaab u dhiganta 30 boqolkiiba qiimaha suuqa uu ka joogo saamiga ay shirkaddu gadday.

### Qodobka 14aad: Sanduuqa Loo Qoondeeyey Dayactirka Deegaanka

1) Sanduuqa dayactirka deegaanka loo qoondeeyey oo qayb ka ah qorshaha qodista iyo horumarinta lama cashuurayo.
2) Qandaraasleyaasha batroolka waa inay bixiyaan saddexdii biloodba mar qoondadii lagu maal gelinayey sanduuqa dayactirka deegaanka iyada oo laga bilaabaayo marka qandaraasluhu helo ruqsadda uu ku hawl galaayo ama ogolaanshaha lagu dhoofinaayo batroolka lasoo saarey.
3) Lacagta ku harta sanduuqa dayactirka deegaanka marka la isticmaalay kadib waxay qayb ka noqonaysaa dakhliga ka soo xerooday shaqada, marka u go'aamiyo:
    a) Wasaaradda masuulka ka ah
    b) Cidda masuulka ka ah arrimaha batroolku uu cadeeyo in shaqadaas la dhameeyey, shirkadaasina xaq u leedahay wixii ku haray sanduuqa; ama
    c) Wasaaraddu waa in ay caddeeysaa in shirkadaasi ay jebisay heshiiskii wax ka qabashada deegaanka ee ay ku maamuli lahayd sanduuqa dayactirka deegaanka.
4) Lacagta laga bixiyay sanduuqa dayactirka deegaanka si loogu qabto shaqada dayac tirka deegaanka kama mid ah dakhliga shirkadda laga cashuurayo.

## CUTUBKA 3AAD: MACDANTA

### Qodobka 15aad: Waajibinta Xuquuqda Lahaanshaha Kheyraadka

1) Cid kasta oo haysta xuquuqaha soo saarista macdanta waxaa ku waajibay in uu bixiyo xuquuqda lahaanshaha khayraadka ka hor celista kharashka iyo wadaageeda faa'iidada.
2) Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxaa loo xisaabinayaa xaddiga lagu asteeyey faqradda 1aad ee jadwalka 1aad ee macdanta la soo saaray sida ku cad faqradda 2aad ee jadwalka 2aad.
3) Qiyaasta macdanta la soo saaray waxaa lagu cabirayaa: -
    a) Goobta cabirka sida ku cad heshiiska wax-soo-saar wadaagga qodista macdanta; ama
    b) Goobta ay go'aamiso Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta haddii aan lagu caddayn heshiiska wax-soo-saar wadaagga.
4) Xaddiga macdanta lagu cabiray ee ku cad faqradda 3aad, waxaa laga jarayaa wasakhda laga saaray macdanta la soo saaray.
5) Muunadaha baaritaanka macdanaha ee ay meel marisay Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta oo masuul ka ah arrimaha macdantu ee loo adeegsaday tijaabada ama waxyaalaha kale ee baaritaan lagama rabo dakhliga lahaanshaha cashuurta. Haddiise la iibiyo waxaa ku waajibaysa dakhliga dawladda ee lahaanshaha khayraadka.
6) Xuquuqda lahaanshaha macdanta waxaa lagu bixinayaa wakhtiga iyo qaabka lagu caddeeyey Cutubka 5aad.

7) Haddii tayada macdanta lasoo saaray ay hoos ugu dhacdo tii la filayey Wasaaradda Maaliyadda ayaa soo saareysa xeernidaamiye qeexayaa xaquuqda lahaanshaha macdanta, mugga iyo qiimaha.
8) Qalabka dhismaha, waxaa loola jeedaa dhagaxa, nuradda, quruuruxa/jaygta, ciidda iyo wixii macadam ah ee la mid ah oo xeerku cadaynayo.

**Qodobka 16aad: Meelmarinta Cashuurta Macaashka Shirkadaha**

1) Cidda ka shaqaynaya hawlaha batroolka waxaa ku waajibaya cashuurta macaashka si waafaqsan Sharci Lr. 5 ee soo baxay 5 Noofeembar 1966[ka].
2) Cashuurta macaashka laga qaadayo Cidda ku hawlan shaqada macdanta waxaa loo xisaabinayaa, laguna cashuurayaa sida uu sharcigaani dhigaayo. Xeerarka iyo xadidaadda ka duwan sharcigaan ee ku jira sharciga lagu xusay faqradda 1aad laguma dabbaqi karo.
3) Cashuurta macaashka ee laga qaadi karo dadka ku lugta leh hawlaha aan ahayn macdanta waxaa lagu xisaabinaya, laguna cashruurayaa Sharciga cashuurta macaashka shirkadaha. (Sharci Lr. 5 ee soo baxay 5 Noofeembar 1966[ka]).
4) Waa in la kala xisaabiyaa dakhliga ka soo xerooda iyo kharashaadka ku baxa hawlaha macdanta iyo kuwa aan macdan ahayn ee shirkadda, si aan xisaab looga tegin.
5) Qiimaynta cashuurta sanadlaha shirkadda ku hawlan soo saarista macdanta waxaa lagu xisaabinayaa sida ku cad faqradda 3aad ee jadwalka 2aad.
6) Xisaabinta cashuurta ku waajibaysa dakhliga shirkadda waxaa lagu salaynayaa dakhliga ka soo xarooda goobta ama ceelka laga soo saarayo macdanta ee ku wada yaalla hal xirmo. Xisaabinta ku saabsan khasaaraha ka go'aya dakhliga la cashuurayo waxay loo raacayaa sida ku cad Qodobka 17aad ee Sharcigaan.
7) Marka la xisaabinayo cashuurta ku waajibtay dakhliga ka soo xerooda hawlaha macdanta waxaa loo xisaabinayaa sida soo socota:
    a) Goob ama ceel kasta waxaa loo tixgelinayaa inuu ka madax-bannaan yahay goobaha ama ceelasha kale ee ay ku wada yaallaan hal xidhmo gudaheed, waxaana ku waajibaya qofka in ay diyaariso xisaabaadkiisa gaarka ah;
    b) qofka wuxuu xisaabanayaa dakhliga guud ee ka soo xarooday goobta ama ceelka, khasaaraha iyo cashuurta ku waajibtay goobtaas ama ceelkaas sanadkaasi.
8) Cidda agab ama qalab u adeegsada ceelal ama goobo kala duwan, waxaa loola dhaqmayaa in agabkaasi ama qalabkiisa uu iska iibiyay ama soo iibsaday xataa haddii lahaanshaha agabka ama qalabka uu qofku wareejiyay milkiyaddiisa uusan ka wareegin.
9) Haddii laba daraf ama ka badan ay ku shurkoobaan haysashada xuquuqda lahaansho xidhmo macdan, waxaa loo xisaabinaya mid kasta gaarkiisa.
10) Macaashka ka Dhasha kala iibsiga xuquuqda lahaansho ee xidhma macdan waxaa lagu cashuurayaa 20%.
11) Jadwalka 3aad farqada (J) ee ku saabsan beeca eexda ayaa ku dhaqangalaya ganacsiga dhexmaray shirkado ganacsi wadaag ah:
    a) kuwaas oo ka fulinaya howlo macdan soo saaris goob, ama ceel yo wixii kale oo howlo la xiriira ah; ama
    b) Macaamilka u dhaxeeya labo qof iyo ka badan oo isla leh xuquuq macdan.

**Qodobka 17aad: Hawlaha Macdanta ee Kala Soocan**

1) Howlaha macdanta ee khuseeya fulinta heshiis macdan waxaa loola dhaqmayaa in ay yihiin mid gaar u taagan.
2) Marka goob kamid ah xidhmo si gaar ah loogu asteeyo in laga soo saaro macdan:

a) Howlaha macdanta ee laga fuliyay xidhmada ka hor astaynta goob ka mid xidhmada si looga soo saaro macdan iyo howlaha macdanat ee laga fuliyay goobtii la asteeyay kadib astaynta waxaa loo tixgelinayaa in yihiin howl macdan laga fuliyay goob si gaar ah u astaysan.
b) Haddii ay jiraan howlo macdan oo laga fulinayo isla xidhmada balse ka baxsan goob horay si gaar ah loogu asteeyay in laga soo saaro macdan waxaa loola dhaqmayaa aag gaar ah.

3) Haddii ay shirkaddu ka baxdo ama celiso qayb ka mid ah xidhmada isla markaasina laga fuliyay howl macdan kadib astaynta goob laga soo saarayo macdan; waxaa howlahaasi macdan loo qaddarinayaa in laga fuliyay goobta loo asteeyay in laga soo saaro macdanta.
4) Wasaaradda Maaliyadda oo masuul ka ah Dakhliga, ayadoo la kaashanaya Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta masuulka ka ah Arrimaha Macdanta, waxay dejinayaa xeer-nidaamiyeyaal khuseeya:
    a) Qeexidda ama cadaynaya howlaha macdanta ee kala soocan;iyo
    b) Sida loo maaraynayo Xidhmooyinka deriska ah iyo mideynta xidhmooyin.
    c) Kala xadaynta iyo isku dhafka xuquuqaha macdanta.

## Qodobka 18aad: Dakhliga La Cashuuri Karo Iyo Khasaaraha Laga Goyn Karo

1) Cashuurta ku waajibta dakhliga ka soo xarooda goob ama ceel sanadkiiba waxaa loo xisaabinayaa dakhliga soo xarooday oo laga jaray isugeynta kuwa soo socda:
    a) Kharashaadka sanadka ku baxay shaqada qodista ee sharcigu ogol yahay; iyo
    b) Khasaaraha la oggolaaday ee ka dhashay shaqada la fuliyey sanadka, iyadoo lagu darayo khasaarooyinkii sanadihii ka horeeyey.
2) Marka laga jarayo kharashaadka iyo khasaaraha dakhliga ka soo xarooday howlaha macdanta ee ku sheeggan faqradda 1aad, waxaa marka ugu horraysa dakhliga laga jarayaa kharashaadka kadibna khasaaraha.
3) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee laga jarayo dakhliga kuna sheeggan faqradda 1aad, xarafka (b) waa kharashaadka ku baxay goob ama ceel macdan sanadkaas kuwaas oo ka bata dakhliga soo xarooday sanadkaas.
4) Khasaaraha sharcigu oggolyahay ee laga jarayo dakhliga kaasi oo laga guurinayo sanadihii la soo dhaafay wuxuu socon karaa muddooyinka hoose hadba tii soo horraysa:
    a) Haddii la wada bixiyo sanadkii la galay sida ku xusan faqradda 1aad, xarafka (b) ee qodobkan;
    b) muddo afar iyo toban (14) sano oo ka billaabanaysa marka la ogaado in khasaaraha la galay; ama
    c) Illaa heshiiska wax soosaar wadaaggu dhammaanayo.
5) Waxaa reebban in khasaaro horay loo soo xisaabiyay lagana jaray dakhli in mar labaad laga jaro dakhli kale oo ka xarooday goob ama ceel macdan.
6) Goob ama ceel kasta waxaa laga jarayaa keliya khasaarihiisa. Waxaa reebban in khasaaro khuseeya goob ama ceel macdan laga jaro goob ama ceel kale oo macdan ama dakhli ka yimaada howl aanan khuseyn howlaha macdanta.
7) Khasaaro ka yimaada howlo aanan khuseyn howlaha macdanta lagama jari karo dakhliga ka yimaada howlaha macdanta.

## Qodobka 19aad: Dakhliga Ka Soo Baxa Deegaannada Kala Duwan Ee Hawlaha Macdan Qodista

1) Dakhliga sanadle ee ka soo baxa aagagga kala duwan ee macdanta qofku (shirkaddu) qodayso

waa isu geynta qiimayaashaan soo socda oo aan waxba laga goynayn:

a) Qiimaha suuqa ay ka joogto macdanta la soo saaray sanadkaas, iyadoo laga soo bilaabayo markii hawsha la bilaabay sida uu cadaynayo Qodobka 14 iyo qiimaha lagu cadeeyey faqradda 2 ee jadwalka labaad.
b) Lacagta guud ahaan laga helay inta lagu guda jiray sanadka gudihiisa hawlaha macdanta , oo ay ku jiraan xuquuqaha la xiriira macdanta, ha ahaato hanti guurto ama maguurto.
c) Khidmada iyo qiimayaasha kale ee laga qaadayo sanadka ee ka imanaya adeegyada, xogaha ama adeegyada kale ee lagu bixiyey hawl galka;
d) Magdhowga iyo habraacyada caymiska lagu bixinayo wakhtiga sanadka lagu jiro iyadoo loo eegayo hawl galka shaqada;
e) Iyadoo la tix gelinayo in wixii ka soo kordha sanduuqa dayactirka deegaanka, wixii qiime ah ee lagu cadeeyey qodobka 23.

2) Waxaan soo hoos gelayn faqradda 1aad ee kor xusan dakhliga laga helo dulsaarka raasamaalka iyo wixii la hal maala.

## Qodobka 20aad: Kharashaadka Laga Goyn Karo Dakhliga

1) Kharashaadka ku sheeggan faqradda 2aad ee Qodobkaan waxaa laga jarayaa dakhliga sanadlaha ah ee ka soo xarooda goob ama ceel macdan iyadoo la qaddarinayo shuruudaha soo socda:
    a) In kharashka la galay sanadkaasi uuna si toos ah u khuseeyo howlaha macdanta;
    b) Kharashkaasi yahay mid dib loogu celin karo shirkadda si waafaqsan heshiiska wax soosaar wadaagga; iyo
    c) Kharash kasta oo aan lagu diidin Qodobka 10 ee sharcigaan.
2) Kharashaadku waa: -
    a) Lacagaha la siiyey dawladda oo ay ku jiraan mushaharooyinka, lahaanshaha dakhli iyo cashuurta ka baxsan cashuurta macaashka;
    b) Qiimaha ku baxay shaqada iyo hawlaha la qoondeeyey oo ay ka mid yihiin gunooyinka la siinayo shaqaalaha, faa'iidooyinka shaqaalaha ee dawladda, qoondooyinka, caymiska caafimaadka, nolosha iyo dakhliyada dib loo bixinayo;
    c) Qiimaha lagu soo iibiyey agabka, qalabka iyo geynta;
    d) Kharashka ku baxaya gaadiidka iyo shaqaalaha, qalabka, agabka iyo geynta sahayda;
    e) Qiimaha adeegyada loo bahan yahay ku baxaya iyo waxyaalaha ku baxaya qayb saddexaad oo agab keenista ka shaqaynaysa oo ay ku jiraan qiimaynta kharashaadka, hagaajinta xogta, jaangoynta, sahanka, kormeerka iyo talooyinka la xiriira dhulka, injineernimada, kimisteriga, waxyeelada deegaanka, xisaabaadka, xisaab xidhka, sharciga, maamulka shaqaalaha, qandaraasyada iyo alaabta la iibinayo;
    f) Qiimaha ku baxaya maamulka, laakiin aan inuusan ka badan karin 1% kharash sanadeedka qaybaha kale
    g) Kharashaadka caymiska, dayactirka, bedellaadda ama agabyada kaydinta, qalabka iyo sahayda;
    h) Qoondooyinka loo meel mariyey in meel loo dhigo sanduuqa dayactirka deegaanka ee aagga laga qodayo macdanta.
    i) Kharashka dheeriga ka noqda marka la isticmaalay qoondooyinka loo meel mariyey sanduuqa dayactirka deegaanka laga qodayo macdanta;
    j) qoondooyinka dhiirigelinta maalgashigasanadle ee la ogolaaday iyadoo la tix gelinayo xuquuqda macdanta ee ku habboon sida ku cad faqrada 4 ee Jadwalka Koowaad; iyo
    k) Kharashaadka kale ee lagama maarmaanka ah ee lagu bixiyey aagagga kala duwan ee

macdanta laga qodayo.

3) Kharashaad kasta ha ahaado mid rasaamaaliya ama aanan ahayn waa laga jarayaa.

## Qodobka 21aad: Kharashaadka Aan Laga Goyn Karin

1) Waxyaabahan soo socda ma noqon karaan kharashaad laga jari karo:
   a) Qiime dhaca;
   b) Kharash horey loogu darey qiimaha xuquuqda macdanta lagu iibsedey, sida qimaha laga bixiyey shatiga, sii heysashada shatiga, horumarinta aaga shatiga, kharashka ku baxa dacwad ku sahabsan shatiga ama iibinta shatiga, iyo gunooyin loo bixiyey shatiga dartii. Laakiin qodobkani mahorjoogsanaayo ku dhaqanka Qodobka 20 (2)(j) ee ku sahabsan gunnada raasamaalka.
   c) Kharashka lagu bixiyey adeegyada maaliyadda sida dulsaarka ama lamacna ah iyadoo latixraacayo sharciga caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
   d) Xuquuda Lahaanshaha ee mudnaanta leh; .
   e) Kharash lagu bixiyey si loogaga helo shirkadda macdanta lacag faa'iido joogta ah iyo wixii la mid ah;
   f) Kharsh wixii dheeri ka ah xaddiga lacageed ee uu cadeeyey Qodobka 21 (5); iyo
   g) Kharashka Xaddiga lagu cadeeyey faqradda 2aad ee Jadwalka 3aad.
   h) Saxiixa gunnooyinka

## Qodobka 22aad: Xisaabaadka

1) Haddii aan si kale loogu cadayn sharcigan, xisaabta lagu darayo ama laga goynayo marka la xisaabinayo dakhliga la cashuuri karo ee aagagga kala duwan ee laga qodayo macdan waa in uu noqdo:
   a) Mid Lagu xisaabiyo qaab xisaabeed waafaqsanna Sharciga Caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
   b) Mid dib loogu sixi karo wixii khaladadaad xisaabeed ah ee soo baxa.
2) Faqradda 1aad laguma maamulayo dakhliga caadiga ah ee ka soo xerooday macdanta soo baxday.
3) Qaddarka lagu darayo ama laga goynayo xisaabinta dakhliga la qaadi karo iyo hantida loo isticmaalay bixinta dakhliga la soo saari karo waa in loo qoondeeyaa halka ay si sax ah ugu xiran yihiin-
   a) Wax ka badan hal aag oo aagagga loo kala duway ee hawlaha macdanta; ama
   b) Hawlaha lagu fulinayo macdanta iyo adeegyada kale ee aan macdanta ahayn.

   Khaas ahaan, haddii macdanta lagu iibiyey qiime ka badan qiimaha suuqa waxaa lagu cadeeyey faqradda 2aad ee Jadwalka 2aad, wixii xad dhaaf ah waxaa loo qoondeeyay in lagu bixiyo adeegyada aan macdanta ah, waana la cashuurayaa iyadoo qayb ka ah dakhliga la soo dallacayo ee howlahaas
4) Sharciyada laba shirkadood oo is ahi wax ku kala iibsanayaan waxaa lagu dabaqayaa qimaha lagu daray ama laga gooyey ee xisaabta dakhliga laga qaadi karo ee aagagga hawlaha qodista macdanta ee la kala saaray iyo qayb kastoo ku xusan faqradda 3aad.
5) Haddii qofka masuulka ka ah aagagga kala soocan ee macdanta uu ku shaqeysiiyo qof eey is leeyihiin, ka iibsado hanti, ama adegya kale ee lagu fulinayo hawsha, wax kastoo kharash ah oo laga jarayo dakhliga shirkadda oo uu qofkaasi qaadanaayo faa'iidada inuu kahelo looma ogola.
6) Ujeedooyinka faqradda 5aad, cadadka faa'iido la'aanta ah caadi ahaan waa qiimaha qofka loo xilsaaray hawlaha uu ku bixinayo shaqooyinka ku baxaya hantida, adeegyada ama hawlaha,

laakiin kuma jiraan kharashaad kasta oo ku baxay cidda kale uu si gaar ah ugu eexday.

## Qodobka 23aad: Kala Wareejinta Xuquuqaha Macdanta Ee Toosan Iyo Kuwa Dadban

1) Haddii qofka u haysta ruqsadda macdanta raadinta la siiyo ruqsada qodis, ruqsadaasi waxay u ogolanaysaa inuu ka qodi karo xidhmadii uu ruqsadda raadinta macdanta u haystay; Waxaana faahfaahinaya qodobadaan soo socda:
    a) Lagama soo qaadayo qofkaas inuusan gadayn qayb ka mid ah ruqsadiisa
    b) Cashuur dhaafka ay ruqsadaasi xaqa u leedahay waxaa loo kala qaybinayaa qaybta lahaanshaheeda uu weli haysto iyo qaybtuu gaday.
    c) Wixii ka danbeeya sanadkaas cashuur dhaafka loo qaybiyey labada aag, mid kasta gaarkeeda ayaa loo cashuurayaa.
    d) Kharashka lagu gatay ruqsadda ayaa lagu qiimaynayaa cashuurta.
2) Wasiirka masuulka ka ah dakhliga, isagoo la kaashanaya wasiirka masuulka ka ah arrimaha macdanta, wuxuu dejinayaa xeer-hoosaad hoos imanaya faqradda 1aad.
3) Marka la go'aaminayo qiimaha lagu kala iibsaday xuquuqda macdanta oo ay ka mid tahay lahaanshaha dakhliga dawladda, waxaa loola dhaqmayaa sidan:
    a) Qiimaha ama faa'iidooyinka la kala qaadanayo mustaqbalka wakhtiga la joogo ayaa xisaabta lagu darayaa.
    b) Marka cadadkaas ama faa'iidooyinkaas la doonayo in la helo, wax ka badan hal sano mustaqbalka, waxaa lagu qiimaynayaa qiimaha eey markaas suuqa ka joogaan, iyadoo la isticmaalayo habraac qiime ku habboon.
4) Cadadka lagu go'aamiyey faqradda 3aad waxaa loola dhaqmayaa qayb ka mid ah qiimaha lagu bixiyey iibsashada iyo helitaanka xuquuqda macdanta.
5) Haddii hay'ad haysata xuquuqda macdanta ay gaddo 25 boqolkiiba ama ka badan, isbeddelka ku yimaada lahaanshaheeda aasaasiga ah ee hay'adda waxaa loola dhaqmayaa sidii inay saamiyada xuquuqdeeda macdan aanay is bedelin.
6) Marka lagu dhaqmayo faqrad hoosaadka 5) shirkadda waxaa loola dhaqmayaa sidan:
    a) Waxaa loola dhaqmayaa inay shirkaddu qiimahay ku gadday uusan bedelayn saamigeedii rasmiga ahaa ee boqolayda, iyo
    b) Kharashaadka ay shirkaddu bixisay isaguna ma bedelayo boqolayda saamiga hantiyeed ee shirkadda.
7) Shirkad ujeedkeedu yahay inay bedesho saamigeeda sida lagu cadeeyey faqradda 5aad waa in ay faahfaahin dheeraad ah siisaa Hay'adda dakhliga cashuuraha isbedelkaas, waana inay ku ogaysiisaa muddo 30 maalmood gudahood xilligay isbedelka samaynayso.
8) Hay'adda ku guuldaraysata inay ogeysiiso Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga muddo 30 maalmood ah gudahood, waxaa lagu ganaaxayaa 30 boqolkiiba qiimaha suuqa uu ka joogo saamigay gadday.

## Qodobka 24aad: Sanduuqa Loo Qoondeeyey Dayactirka Deegaanka

1) Sanduuqa dayactirka deegaanka loo qoondeeyey oo qayb ka ah qorshaha qodista iyo horumarinta macdanta, lama cashuurayo.
2) Qandaraasleyaasha macdanta waa inay shubaan saddexdii biloodba mar qoondadii lagu maal gelinayey sanduuqa dayactirka deegaanka iyada oo laga bilaabaayo marka qandaraasluhu helo ogolaanshaha uu ku hawl galaayo ama ogolaanshaha lagu dhoofinaayo macdanta lasoo saarey
3) Lacagta ku hadha sanduuqa dayactirka deegaanka marka la isticmaalay kadib waxay qayb ka noqonaysaa dakhliga ka soo xerooday shaqada, marka; -

a) Wasiirka masuulka ka ah arrimaha macdanta uu cadeeyo in shaqadaas la dhameeyey, shirkadaasina xaq u leedahay wixii ku hadhahay sanduuqa; ama
b) Wasiirku inuu caddeeyey in shirkadaasi ay jebisay heshiiskii wax ka qabashada deegaanka ee ay ku maamuli lahayd sanduuqa dayactirka deegaanka.

4) Lacagta laga bixiyay sanduuqa dayactirka deegaanka si loogu qabto shaqada dayac tirka deegaanka kama mid ah dakhliga shirkadda laga cashuurayo.

## CUTUBKA 4AAD: HEESHIISYADA QODISTA KHAYRAADKA DHULKA HOOSTIISA

### Qodobka 25aad: Dhowrista Heshiisyada Qodista Khayraadka Dhulka Hoostiisa

1) Marka laga soo tago sida ku cad qodobkaan ama si kale loogu cadeeyey xeerarka sharciyada cashruuraha, heshiisyada qodista kheyraadka dhulka hoostiisu saamayn kuma lahan sharciga dakhliga.
2) Iyadoo la tixraacayo Qodobka 27 (3) ee xeerkan, wuxuu khuseeyaa keliya;-
   a) Marka wasiirka masuulka ka ah dakhliga uu cadeeyo saxnaanta iyo run ahaanta nuqulka heshiiska qodista kheyraadka dhulka hoostiisa uuna u gudbiyo nuqul ka mid ah hayadda maamulka dakhliga; iyo
   b) Cidda ku qoran qandaraas qodista khayraadka dhulka hoostiisa waa inuu yahay ciddii/shirkada saxda ahayd ee ku qoran heshiiska.
3) Hay'adda masuulka ka ah dakhligu waxay ku dhaqmaysaa sharciga maamulka dakhliga iyadoo tix gelinaysa:
   a) Qodobka degananshaha maaliyadeed ee lagu heshiiyey ee ku jira heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa (arag qodobka 25); iyo
   b) Cashuur dhaaf uu bixiyay maamul goboleed ama dawlad hoose oo ku qeexnaa heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa (arag Qodobka 26).

### Qodobka 26aad: Xuquuq Maaliyadeedka Lagu Heshiiyey Ee Aan Is Bedelin

1) Hadii dhaqan galka heshiiska kadib;
   a) Dawladda Soomaaliya ay sharciyeyso cashuur hore aan u jirin Cashuurtaa oo ku waajibeysa kaliya shirkadaha ka shaqeeya batroolka iyo macdanta.
   b) Isbeddel ku yimaaddo Shuruucda dalka (ama Fasiraadda Shuruucda Dalka) taas oo
      i. Saameyn dhaqaale kule Shirkadaha batroolka iyo macdanta
      ii. ama lagu beegsado qandaraaslayaasha ka shaqeysta batroolka/macdanta, iyo
   c) iyada oo arimahaa ku xusan (a) iyo/ama (b), eey ka dhalatey dhaqaala xumo baaxad leh oo soo foodsaartey shirkadaha ka shaqeysta batroolka iyo/ama macdanta tusaale ahaan hoos u dhac kuyim faaiidadii eey ka heli jireen shaqada batroolka iyo/ama macdanta,
2) Shirkadu waxey qoraal ahaan ku wargelini wasaaradda batroolka arintani waxeyna qorsheynayaa kulan dhexmara labadooda mudo (90) maalmood gudaheed ah kulankaas oo ujeedkiisu yahey in laxaliyo dhibta dhaqeele-xume ee shirkada kasoo gaadhey cashuurtaa cusub ee dawladdu soo rogtey kuna gaaryeeshey shirkadaha ka shaqeeya batroolka/macdanta.
3) Hadii marka kulanku dhexmaro shirkadda iyo wasaaradda eey is-afgarani waayaan ama ku guuldareystaan iney wada-gaadhaan heshiis, Shirkadda waxaa u banaan in eey furato gal-dacwadeed dhexdhexaadin.
4) Faqradahani kor kuxusan waxaa shardi u ah in cashuurta lasoo rogey lagu koobey kaliya shirkadaha ka shaqeeya batroolka iyo/ama macdanta.
5) Waxa kale oo shardi u ah in khasaaraha dhaqaale ee shirkadda kasoo gaadhey cashuurta lasoo rogey uu kor u dhaafo $1,000,000 (hal milyan oo dolarka mareykanka ah); hadii shirkadda lagula

heshiiyo in loo magdhawo khasaarihii kasoo gaadhey sanadka, cashuurta lasoo rogey awgeed, waxa la magdhabayaa kaliya wixii dheeri ka ah ee kor u dhaafsan $1,000,000 (hal milyan oo dolarka mareykanka ah). Taas macneheedu waa khasaaraha $1,000,000 (hal milyan oo dolarka mareykanka ah) ee ugu horeeya lama magdhabaayo.

6) Faqraddani uma fasaxeyso shirkadaha in ay shuruucda dalka baalmaraan. Shuruucdaasi ha ahaadaan kuwo loo jideeyey si loogu daryeelo caafimaadka iyo bad qabka shaqaalaha ama bii'ada ama ha ahaadaan shuruuc iyo xeerhoosaadyo loogu talo-galey daryeelka hantida iyo dadka Soomaaliyeed.

## Qodobka 27aad: Cashuur Dhaafka Ay Samaynayaan Dawladda Federaalka, Dawlad Goboleedyada Iyo Dowladaha Hoose

1) Si waafaqsan Qodobka 24aad ee Sharcigan:
    a) Dawlad Goboleedyada iyo Dawladaha Hoose waa inay u hoggaansamaan cashuur dhaafka loo sameeyey shirkadaha ee lagu qeexay heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa.
    b) Shirkadaha ku hawlan baadhista iyo qodista Batroolka waxa ay la soo degaan inta ay ku jiraan hawlaha baadhista iyo qodista lagama qaadayo cashuur. Markay bilaabaan wax soo saaraka cashuur dhaafkani wuu joogsanayaa.
    c) Qalabkii ay keensato shirkad ku hawlan qodista khayraadka dhulka hoostiisa, waxaa laga dhaafayaa cashuurta iibka, haddii cashuurka dhaafka uu ogol yahay sharcigani. Waxay bixinaysaa cashuurta iibka haddii shirkadaasi iibiso qalabkii cashuur dhaafka loogu sameeyey si ay ugu fuliso hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa.

## Qodobka 28aad: Dhammaan Heshiisyada Qodista Khayraadka Dhulka Hoostiisa Looma Ogola Laba-Jeer Faa'iid

1) Qodobkaan wuxuu dhigayaa in heshiiska qodisa khayraadka dhulka hoostiisa aan lagu wada heli karayn;
    a) In la ilaaliyo qoondadii faa'iido wadaag iyo dheelli-tirnaanta dakhliga ka dhalaneysey ee dhaqan galka aheyd wakhtigii heshiiska la saxiixay; iyo
    b) Faa'iidooyinka ka dhasha bedelaadaha lagu sameeyo xeerka dakhliga.
2) Marka loo eego qodobka 24, haddii heshiiskaasi uu beddelo wixii ku qornaa sharciga dakhliga ee khuseeyey heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa, waxaa lagu sii dhaqmi doonaa sharcigaas la bedelay, ilaa; -
    a) Dhamaadka heshiiska ama qodobadiisa; ama
    b) Qofka oo ka tanaasulay aaggii la siiyey, tanaasulkaas oo ogolaansho ka haysta wasiirka masuulka ka ah arrimaha Batroolka ama macdanta.
3) Marka la xisaabinayo cashuuraad sanadeedka dakhliga ee ku waajibay qof, iyadoo la tixraacayo faqradda 2aad ee kor ku qoran, Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhliga waxa u banaan;
    a) Inay sii waddo meel marinta xeerarka horay u jiray ee ah sharciga dakhliga, kaasoo Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhligu u aragto in uu ku haboon yahay ama ay tahay in la fuliyo sida ku xusan faqradda 2aad; iyo
    b) Iney Ku dhaqmi waydo wax kastoo cusub ama isbedel lagu sameeyey sharciga dakhliga cashuuraha haddii ay u aragto;
        i. Inay la xiriirto xeerarka ku cad faqradda (a); ama
        ii. Inaysan la xiriirin sharcigii hore ee dakhliga cashuuraha.
4) "Sharcigii hore ee dakhliga cashuuraha"

a) Waxaa loola jeeda sharciga dakhliga cashuuraha ee dhaqan galka ahaa wakhtiga la gelayey heshiiska qodista khayraadka dhulka hoostiisa sida ku cad faqradda 2aad; iyo
b) Marka eey munaasib tahay waa sharci dakhliyeed xitaa haddii la beddeley.

## CUTUBKA 5AAD: MAAMULKA IYO MAARAYNTA

### Qodobka 29aad: Xisaabaadka, Qiimaynta iyo Bixinta Cashuuraha

1) Iyadoo la tix gelinayo hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, mulkiilaha xuquuqda qodista khayraadka dhulka hoostiisa waa in:
   a) Uu joogteeya buugta xisaabaadka oo waafaqsan Sharciga Caalamiga ah ee xogta maaliyadda;
   b) lacagta uu ku dejinayo xisaabaadka lahaanshaha, dakhliga, iyo cashuurta macaashka ay noqoto lacagta Doolarka Maraykanka ama lacagtii kale ee lagu soosaaro xeer nidaamiye.
2) Kala doorashada hoos imanaysa faqradda 1aad (b) ee kor ku xusan waa inay ahaataa;
   a) qoraal loona gudbiyey Wasaaradda Maaliyadda oo masuul ka ah dakhligu wakhtiga lagu dhaqmayo heshiiska lahaanshaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa
   b) dhaqan gal muddada uu heshiisku dhaqan galka yahey.
3) Haddii shirkaddu doorto lacag qalaad iney ku jaan gooyso xisaabaadka ama qiimaynta, Wasaaradda Maaliyadda oo masuul ka ah dakhliga waxay u oglaan karaan shirkada iney ku bixiso xuquuqihii dakhliga ama cashuurta macaashka lacagtaas ay doortay. Ogolaanshaha Wasaaradda Maaliyadda waxa ay ku imaan kartaa haddii ay u aragto iney sidani tahay sida ugu haboon.
4) Qodobkaani ma xadidayo Qodobka 32 ee Sharciga maamulka Dakhliga (Tr.13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019).
5) Wasaaradda Maaliyadda oo Mas'uul ka ah Maamulka dakhliga cashuuruhu waxay xaq u leedahay inuu Hanti-dhowr gudaha (Internal Audit) ku sameeyaan shirkadda fulinaysa qodista khayraadka dhulka hoostiisa hawlaheeda maaliyadeed tobanka sano ee ku xiga sanadka ay soo gudbisay xisaabteeda.

### Qodobka 30aad: Cashuur Celinta Iyo Bixinta Xuquuqda Lahaanshaha Khayraadka

1) Xuquuqaha dakhliga dawladda ee laga helayo Batroolka ama macdankta waa in lagu bixiyaa bil-waliba 25 maalmood gudahood kadib bishii la soo saaray Batroolka iyo/ama macdankta.
2) Markastoo la bixinayo xuquuqda lahaanshaha kheyraadka waa inuu la socda warqadaha cadaynaya bixinta oo la geeyo Wasaaradda Maaliyadda oo Mas'uul ka ah Maamulka dakhliga.
3) Waa in bixinta xuquuqda lahaanshaha iyo cashuurta loogu gudbiyaa hay'adda masuulka ka ah dakhliga hab waafaqsan sharciga. Habkaas oo ay ku cadyihiin qodobadaan soo socda:
   a) Cadadka Batroolka ama macdanaha ee ay ku waajibtay xuquuqda cashuurtu;
   b) Qiimaha suuqa ee uu Batroolku ama macdantu ka joogto oo lagu xisaabiyey sida waafaqsan faqradda 2 ee jadwalka koowaad ama faqradda 2 ee jadwalka labaad, sida hadba kiiska ay tahay in la waafajiyo;
   c) Xaddiga xuquuqda lahaanshaha kheyraadka ee ay tahay inuu qofka bixiyo; iyo
   d) wax kastoo warbixin ah oo ay u bahan tahay hay'adda masuulka ka ah dakhliga
4) Marka la soo gudbiyo galka lagu bixinayo xuquuqda lahaanshaha kheyraadka iyo cashuurta macaashka ee la siinayo dawladda waxaa Wasaaradda Maaliyadda oo Mas'uul ka ah Maamulka dakhliga samaynaysaa qiimeyn sida waafaqsan sharciga Maamulka Dakhliga (Shar Lr. 13 ee soo baxay 27 Octoobar 2019).

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

## Qodobka 31aad: Qiyaasta, Cashuur Celinta Iyo Bixinta Cashuurta Macaashka Shirkadaha

1) Sharciga cashuurta macaashka ee tirsigiisu yahay 5 soona baxay 5 Noofeembar 1966 iyo Sharciga maamulka dakhliga cashuuraha ee tirsigiisu yahay 13 ee soo baxay 27 Otoobar 2019 iyadoo lala akhrinayo sharcigan, wuxuu dabaqayaa qiimaynta iyo bixina cashuurta macaashka ee laga rabo dadka fulinaya hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, khaas ahaan cashuurta macaashka waxaa loo bixin karaa in shirkaddu hormariso, ama ay u bixiso qaybqayb, ama sanadkiiba mar eey bixiso.
2) Qofka fulinaya hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa si loo qiimeeyo cashuurta sanadlaha ee ku waajibtay waa inuu soo gudbiyaa:
   a) Qiyaasta sanadka wixii cashuur ku waajibay ee uu u bixin rabo qayb qaybta sida ku cad faqradda 8 ee Jadwalka saddexaad ee sharciga; iyo
   b) Qiyaasta sanadka wixii cashuur ku waajibtay ee uu hal mar bixin rabo, sida ku cad sharciga cashuurta macaashka ee tirsiigu yahay 5 soona baxay 5 Noofeembar 1966.
3) Cashuur celinta iyo qiyaasta cashuurta ku waajibtey waa in uu cidda ku soo gudbiyay labadaba; hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa iyo hawlaha aan qaybta ka ahayn qodista khayraadka.
4) Cashuur celinta iyo qiimaynta lagu soo qeexay faqradda 2aad, waa in-
   a) Loo gudbiyaa Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhliga.
   b) Ku jiraan qaybaha kala duwan ee loo kala qoondeeyey hawlaha Batroolka, hawlaha macdanta iyo hawlaha aan ahayn qodista khayraadka dhulka hoostiisa.
   c) Kala cadaynta qiyaasta qaybaha hawlaha macdanta iyo hawlaha Batroolka waa in ay:
      i. Cadaysaa dakhli cashuureedka sanadlaha ah ee kaga waajibay qofka shaqooyinka batroolka ama macdanta iyo habka loo xisaabiyey.
      ii. Cadaysaa celceliska xaquuqda lahaanshaha iyo cashuurta macaashka kaga waajibtay dakhligaas ee hawlaha batroolka iyo macdanka.
      iii. Cadaysaa in cashuur kasta oo uu bixiyey qofku sanadka, ha ku bixiyee hormarin, qayb qayb ama sanadkiiba mar.
      iv. Cadaysaa cadadka cashuurta uu bixinayo waa cashuurta ku waajibtay sanadka sida ku cad faqradda ii) oo laga gooyey intuu horay u bixiyey sida ku cad faqradda iii).
      v. Cadaysaa cadadka cashuurta uu buxinayo wakhtiga uu gudbiyay qiimaynta ama cashuur celinta; iyo
      vi. Cadaysaa wax kastoo warbixin ah oo ay u baahan tahay Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhliga;
   d) Qaybta dakhliga ka imanaya hawlaha aan ahayn qodista khayraadka dhulka hoostiisa waa in lagu qiyaasaa ama lagu cadeeyaa iyadoo la tix gelinayo qoraalka ku cad faqradda 8 ee Jadwalka Saddexaad ee sharcigan ama qodobka 28 ee sharciga cashuurta macaashka ee tirsigiisu yahay 5 soona baxay Noofeembar 5 1966, kolba sidii ku haboon.
5) Marka la gudbinayo qiyaasta ama cashuur celinta Wasaaradda Maaliyadda oo masuulka ka ah dakhliga waxay u arkaysaa qiyaas, waxayna dib u samaynaysaa qiimayn waafaqsan Sharciga Maamulka dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.

## Qodobka 32aad: Xiriirka Uu Sharcigani La Leeyahay Sharciga Maamulka Dakhliga

Sharcigan waxaa loogu dhaqmayaa iyadoo lala akhrinayo lana waafajinayo qodobada 3, 4 iyo 15aad ee Sharciga Maamulka dakhliga Tr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## Qodobka 33aad: Wada Shaqaynta Hay'addaha Dawladda

1) Marka la dhaqan gelinayo sharcigaan, Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga waa in ay ula shaqayso si dhow dhamaan hay'addaha dowladda. ujeedada arrintaan laga leeyahay waa Wasaaradda Maaliyadda iyo hay'addo sharciyeedka kale waxay wadaagi karaan xog kasta oo muhiim u ah hawlahooda shaqo, waxayna wada qaban karaan baaris wadajir ah. Tani ma xanibayso waajibaadk Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga inay hesho xogaha iyo baarista ay doonayso inay ku fuliso hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, si ay u fuliso waajibaadkeeda maamul ee dakhliga
2) Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga wuxuu tix gelinayaa go'aamada hay'adaha maamula qodista khayraadka dhulka hoostiisa ee khuseeya:
    a) Cadaymaha qofka ku hawlan hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa;
    b) Cadadka Batroolka iyo macdahana ee uu soo saaray qofka fulinayaa hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa;
    c) Kala xadaynta dakhliga kasoo xerooday hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, dakhligaasoo la cadaynayo aagga hawlaha batroolka ama hawlaha macdanka laga fulinayo, hadba sida kiisku yahay;
    d) Kala xadaynta kharashka ku baxay hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa, kharashkaasoo loo ka la cadaynayo aaggaga hawlaha batroolka ama hawlaha macdanka laga fulinayo, hadba sida arinka yahay; iyo
    e) Haddii qofku jebiyey heshiiskii dayactirka deegaanka ee uu ogolaaday wasiirka masuulka ka ah hawlaha batroolka ama macdanta;
3) Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga iyo Hay'addaha sharci ee ay wada shaqeeyaan waa inay ilaaliyaan sirta xogta lala wadaagay sida ku cad Qodobka 20 ee Sharciga Maamulka Dakhliga Tr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.
4) Qodobkaan waxaa lagu dabaqayaa iyadoo la kaashanayo Qodobka 19 ee Sharciga Maamulka Dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 Otoobar 2019.

## Qodobka 34aad: Saadaasha Maaliyadeed

1) Qofka haysta xuquuqda qodista khayraadka dhulka hoostisaa waa in uu:
    a) Diyaariyaa saadaalin muddada uu haysto xuquuqda lahaanshaha qodista khayraadka, saadaalinta waxaa qeexaysa;
        i. Cadadka, ilaha, habraaca iyo shuruudaha maalgashi ee ku baxay xuquuqda uu haysto ee hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa;
        ii. Kharashaadka ku baxaya sahaminta, qodista, horumarinta iyo kharashka raasamaalka ee la galay bilowga wax soo saarka;
        iii. Cadadka soo baxaya iyo sida loo iibgeynayo, gaar ahaan qiimaha lagu iibinayo;
        iv. Heshiisyada wax soo saarka iyo faa'iido wadaagga oo ay ku jiraan qaybinta la rajaynayo, siyaasadda eey ku qotonta qaybinta iyo siday u kala muhimsan yihiin dadka wax loo qeybinaayo iyo lacag labixinayo, khaas ahaan markay noqoto dulsaarka iyo bixinta daymaha;
        v. Cashuuraha iyo dakhliyada kale ee la siin karo Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo habka ay tahay in cadadkaas loo bixinayo loona xisaabiyo; iyo
        vi. Wixii kale ee war bixin ah ee Wasiirka masuulka ka ah dakhliga uu waajibiyo;
    b) Waa inay isticmaalaan shaxda ay dejisay Wasaaradda masuulka ka ah dakhliga si loo sameeyo saadaalin lagu tix raacay faqradda a); iyo
    c) Waa inay shaqaalaysiiyaan iyagoo ogaysiinaya Wasiira maaaliyadda, sarkaal;
        i. Leh khibrad dheeraad oo uu ku fulin karo warbixinaha lagu tix raacay faqradda (a);

ii. Xiriirin kara Wasaaradda masuulka ka ah dakhliga iyadoo la tix raacayo arrimaha ku cad qodobkan.

2) Saadaasha hoos imanaysa faqradda 1aad (a) waa in la diyaariyaa laba goor sanadkii, iyadoo lagu cadaynayo taariikhda, loona gudbiyo Wasiira masuulka ka ah dakhliga, wakhtia loo gudbinayana waa taariikhaha waafaqsan sharciga.
3) Marka la hello sadaasha lagu qeexay faqradda 2aad ee kor ku xusan, Wasiirka masuulka ka ah dakhliga wuxuu kaga dalban karaa qoraal qofka haysta xuquuqda qodis inuu soo gudbiyo faahfaahin dheeri ah oo ku saabsa saadaasha. Qofka xuquqda haystaa waa inuu ku keenaa 7 maalmood gudahood marka uu helo dalabka Wasiirka.
4) Haddii Mulkiilaha qodista khayraadka uu ogaado xogo markii hore ka qarsoonaa oo la xiriira qodobka (1)(a) waxa ku waajib ah inuu sida ugu dhakhsaha badan xogtaas dheeriga ah Wasiirka ka masuulka ah dakhliga ula wadaago.
5) Milkiilaha shirkadda qodista khayraadka dhula hoostiisa ee ku guul daraysta inuu xogtaas dheeriga ah la wadaago Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga waxaa lagu ganaaxayaa markastoo uu jebiyo dalabkaas qadar lacageed oo u dhexeeya $10,000 (Tobon kun oo doolarka Mareykan ah) ilaa $50,000 (Kontan kun oo doolarka Maraykanka ah).
6) Xogahaas hoos imanaya Qodobkaan waxaa Wasaaradda masuulka ka ah dakhliga u isticmaalaysaa saadaalinta dakhliga iyo maaraynta maaliyadda dawladda. Haddii kale xogahaas waxaa loola dhaqmayaa shuruudaha ku qoran Qodobka 20 ee Sharciga Maamulka dakhliga ee Tr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.
7) Marka la dhaqan gelinaayo qodobkan, Wasaaradda masuulka ka ah dakhligu waa in ay la shaqaysaa hay'addaha dowladda, sida, hay'adda maamulka batroolka iyo Wasaraadda Batroolka

## CUTUBKA 6AAD: Burin iyo Dhaqangal

### Qodobka 35aad: Burin

Sharcigan wuxuu burinayaa dhammaan qodobbada, farqadaha iyo xarfaha ka hor imaanaya sharciyadda hoos ku xusan:

1. Sharciga Dakhliga Cashuurta Lr. 5 ee soo baxay Nofeember 5, 1966.
2. Xeerka Macdanta Lr. 7 ee soo baxay Janaayo 9, 1984.
3. Sharciga Batroolka Lr. 19 ee soo baxay Febraayo 8, 2020.

### Qodobka 36aad: Dhaqangalka Sharcigan

Sharcigan wuxuu dhaqangalayaa markuu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, isla markaana lagu soo saaro faafinta rasmiga ee Jumhuuiryadda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## JADWALKA 1AAD: BATROOLKA

### Qaybta I: Xuquuqda Lahaansha Khayraadka

Boqoleyda lagu xisaabinayo Xuquuqda lahaanshaha khayraadka ee Qodobka 4aad waa 5% Batroolka la soo saarey. Waxana lagu qiimeynayaa sida hoos ku xusan.

1) Batroolka laga soo saaro Soomaaliya waxa lagu iibini karaa kaliya Doolarka Mareykanka xisaabtiisa sanadkiina waxaa loo soo gudbinayaa si saddexdii biloodba mar ah. Marka la iibiyo qiimihiisa waxa loo jaangoynayaa sida;

   Qiimaha Batroolka la iibshey waa qiimaha eey ku heshiiyaan shirkadda iibineysa iyo shirkada iibsaneysa waxase u shardiya in labadaas shirkadood in aysan ka dhaxeyn xiriir isu-daneysi ah (Tusaale ahaan in labada shirkadood midkood midda kale 50% iyo in ka badan sahmiyadeeda ay leedahey)

   Hadiise labadaas shirkadood uu ka dhexeeyo xiriir isu-daneysi ah waxaa la tixraacayaa Qodobbada ku cad iibka eexda ee ku qeexa jadwalka saddexaad ee hoos ku qoran.

2) Marka la xisaabinayo dakhliga lahaanshaha dawladda ee gaaska dabiiciga ah ee la soo saaray waxaa loo qiimanayaa sidan:
   a) Qiimaha lagu gaday gaaska soo baxay oo laga gooyey kharashkii lagu dhoofinayey ee la galay goobtii laga soo qaadayey, ama
   b) Haddii qiimaynta faqrad hoosaadka a) ay ka yar tahay qiimaha suuqa lagu kala iibsanayo waxaa la raacayaa xeerarka cadaynta qiimaha laba shirkadood oo is ahi wax u kala iibsadaan, wax kala iibsigaas oo aan waafaqsanayn qiimaha suuqa.
3) Haddii gaaska dabiciiga ah lagu iibiyey heshiis iibeed mudadiisu ka badan tahay hal sano qiimayntiisa waxaa go'aaminaya hay'adda dakhliga oo kaashanaysa wasiirka masuulka ka ah arrimaha batroolka, heshiis iibeedka waxaa lagu soo saaraya xeer gaar ah, sida ku cad Qodobka 13 ee Sharciga Maaraynta Dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 October 2019). Qiimayntaasi waa in ay waafaqsanaato faqrad hoosaadka 2)(b).

## QAYBTA II: CASHUURTA MACAASHKA

**Boqoleyda lagu bixinayo cashuurta macaashka hawlaha Batroolka waa 30%.**

1) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha waa qoondada la ogolaaday in laga gooyo raasimaalkii lagu gatay xuquuqda Batroolka, taasoo buuxisay shuruudihii kharashaadka raasamaalka ee qiimaynta sanadka. Waxaa soo hoos gelaya wixii intaa la gatay dib loo soo gatay sida uu ku xusan Qodobka 12aad ee Sharcigan.
2) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha ee qiimaynta sanadlaha ahi waa xaddiga loo jaangooyey sanadkaas ee lagu qeexay Faqradda 3aad ee Qodobkan.
3) Cadad kastoo lagu qeexay Faqradda 1aad waxaa loo jaangoynayaa haddii uu qayb ka yahay Qiimayn sanadlaha cadadkaas la kharash gareeyey iyo sanadaha ku xiga inta ay ka dhamaanayso mudada xuquuqda qandaraaska.
4) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha, qoondadaas waa in la isticmaalaa sanad cashuureedka ay qusayso, lamana isticmaali karo wixii sanadkaas ka danbeeya.
5) Haddii la iska iibiyo xuquuq Batrool, sanad cashuureedkaas dhexdiisa qiimaha Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha wuxuu noqonayaa qiimaha u dhigma qiimaha xuquuqda Batroolka.
6) Haddii xuquuqda Batroolka hawlahooda ay ka socdaan wax ka baxsan aagag kala duwan Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha waxaa loo kala qaybinayaa aagagaas.
7) Wasaaradda mas'uulka ka ah arrimaha Dakhliga oo kaashanaya Wasaaradda mas'uulka ka ah

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Batroolka waxay soo saarayaan Xeer Hoosaadyo qeexaya sida aagagaas ku xusan Faqradda 6aad. Qoondada dhiirigelinta maalgashigasanadlaha, qaybtuna waxay noqon doontaa sidaan:

a. Waxay ku salaysnaanaysaa aag kasta oo batrool qiimaha uu suuqa ka joogo,
b. Waxaa ka mid ah boqoleydii lagu cadeeyey markii la meel marinayey qorshaha qodista iyo horumarinta aagga qandaraaska.

Arrintaas waxaa u shardi ah, marka loo qaybiyo boqoleyda qaybta kaga soo hagaagaysa aaggaas qodista iyo horumarinta laga wado lama bedelayo, haddii dib laga ogolaado aag kale oo qodis iyo horumarin lagu samaynayo boqoleydii waxaa loogu kala qaybinayaa iyadoo la tixraacayo sidii ku cadayd qandaraaska aagga la qodayo.

## JADWALKA 2AAD: MACDANTA

## Qaybta I: Xuquuqda lahaanshaha macdanta

### Xisaabinta boqolayda Xuquuqda lahaanshaha macdanta

1) Xisaabinta boqoleyda Xuquuqda lahaanshaha khayraadka waxaa lagu cadeeyey Qodobka 14aad ee Sharcigan, waana marka laga hadlayo Macdanaha lagu soo saaray qandaraaska macdan qodis:
   a. Dhagaxanta qaaliga ee aan ahayn kuwa aadka u qaaliga waxaa laga qaadayaa 6.5%;
   b. Dhagaxaanta aadka qaaliga u ah 8%;
   c. Wixii intaasa an ahayn waxaa laga qaadayaa 3%.
   d. Macdanta lagu soo saaray heshiis macdaneed oo aan ahayn kuwa kor ku xusan waxaa laga qaadayaa 3%.
2) Faqraddan waxay qeexaysaa:

"Biraha qaaliga ah" waa Dahabka, Silver, Platinum, Iridium iyo wixii kale ee ay ku jiraan biraha, haddii ay yihiin wax cadadkoodu iib geli karo.

"Dhagaxaanta qaaliga ah" waxaa loola jeedaa Amber, Amethyst, Beryl, Cat's eye, Chrysotile, dhaymanta, emerald, garnet, opal, ruby, sapphire, turquoise iyo dhammaan wixii la hal maala.

"Dhagaxaanta aadka qaaliga u ah" waxaa loola jeedaa dhagaxaanta qiimahoodu ka sareeyo USD $500,000 Dollar Wiqiyadiiba (Per Ounce) oo u dhiganta ah 28 gram.

### Sida Loo Qiimeynayo Macdanta

1) Iyadoo la tixgelinayo faqraddaan, marka la xisaabinayo lahaanshaha dakhliga dawladda ee macdanta waxa lagu qiimaynayaa.
   a. Qiimaha macdantaas lagu iibiyey oo laga gooyey kharashkii ku baxay suuq geynta, ama
   b. Haddii qiimahaas lagu iibiyey ee lagu qeexay qiimaha ku cadd Faqradda 1(a) uu ka yar yahay qiimaha suuqa ee wax lagu kala iibsado si eexasho ah, waxaa lagu dhaqmayaa si waafaqsan qiimaha suuqa.
2) Marka la xisaabinayo Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha, dhagaxa aadka qaaliga u ah qiimayntooda waxaa;
   a. Lagu jaan goynayaa qiimaha faqradeedka dhagaxa aadka u qaaliga ah ee aan weli la diyaarin.
   b. Waxaa lagu jaan goynayaa qiimaha ugu sareeya ee lagu kala iibsado dhagaxaan qaaliga ah, heshiiskasoo ay galeen;
      i. Cidda haysata xuquuqda qodista macdanta, iyo
      ii. Qiimaynta dawladda ama haddii uusan heshiis jirin iyo
      iii. Qiimeeye madax banana oo dawladda magacowday; iyo
   c. Kadib marka laga gooyo 3% qiimihii ugu sareeyey si loo daboolo kharashkii iib geynta ee la galay kadib soo saaristii

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

3) Marka la xisaabinayo Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha biraha aadka u qaaliga ah waxaa lagu qiimanayaa sidaan soo socota:
   a. Dahabka, qiimaha celcelis ahaan uu dahabku todobaadkaas ka joogo London oo Doolar maraykanka ah;
   b. Wixii dahab ka soo hara, celcelis ahaan qiimaha ee lagu kala iibsado biraha qaliga ah ee laga soo saaray Soomaaliya todobaadkaas dhexdiisa.
   c. Labadaas kiis ee ku xusan (a) iyo (b) kay tahayba waxaa laga goynayaa 3% si loo daboolo kharashkii suuq geynta.
4) Qiimaha celcelis ahaan lagu caddeeyey Faqradda 3aad xarafka (b) waxaa go'aaminaya Wasaaradda masuulka ka ah arrimaha Macdanta, wuxuuna ku salaysan yahay qiimaha maalin kasta oo todobaadkaas ka mid ah ee lagu kala iibsado macdantaas.
5) Haddii macdanaha lagu iibiyey heshiis iibeed mudadiisu ka badan tahay hal sano, qiimayntiisa waxaa go'aaminaya Wasaaradda masuulka ka ah dakhliga oo kaashanaysa Wasaaradda masuulka ka ah arrimaha macdanta, heshiis iibeedka waxaa lagu soo saarayaa xeer gaar ah, sida ku cad Qodobka 131 ee Sharciga Maaraynta Dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 October 2019). Waxaa laga rajaynayaa hab qiimayntaas in ay waafaqsanaato faqrad hoosaadka (1)(b).

## Qaybta II: Cashuurta Macaashka

1) **Boqoleyda Cashuurta Macaashka:** Qiimaynta cashuurta dakhliga ee hawlaha macdanta waa 30%.
2) **Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha ee xuquuqaha macdanta**
   a) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha waa qoondada la ogolaaday in laga gooyo raasamaalkii lagu gatay xuquuqda macdanta, taasoo buuxisay shuruudihii kharashaadka raasamaalka ee qiimaynta sanadka. Waxaa soo hoos gelaya wixii intaa la gatay dib loo soo gatay sida uu qeexayo Qodobka 22aad.
   b) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha ee qiimaynta sanadlaha ahi waa xaddiga loo jaangooyey sanadkaas ee lagu qeexay faqrad hoosaadka (3).
   c) Cadad kastoo lagu qeexay Faqradda 1aad waxaa loo jaangoynayaa haddii uu qayb ka yahay. Qiimayn sanadlaha cadadkaas la kharash gareeyey iyo sanadaha ku xiga inta ay ka dhamaanayso mudada xuquuqda qandaraaska.
   d) Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha, qoondadaas waa in la isticmaalaa sanad cashuureedka ay qusayso, lamana isticmaali karo wixii sanadkaas ka danbeeya.
   e) Iyadoo la tix raacayo qodobka 22, Haddii la iska iibiyo xuquuq macdanta, sanad cashuureedkaas dhexdiisa qiimaha Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha wuxuu noqonayaa qiimaha u dhigma qiimaha xuquuqda macdanta.

## JADWALKA 3AAD: SHARCIYADA CASHUURAHA MACAASHKA

**Dadka xiriirku ka dhexeeyo**

1) Labada daraf oo xiriir ka dhaxaynayo ee sharcigani ka hadlayo waa;
   a) Cid ayaa cid kale qaraabo la ah;
   b) Cidbaa cid kale kula ah shuraako ganacsi;
   c) Cidda iyo shirkad ay cadaynayso Faqradda 2aad ee soo socda; ama
   d) Haddii uusan soo hoos gelayn Faqraddaha a, b, iyo c ee kor ku xusan, waxaa xiriir laga malaysan karo in uu u danaynayo; -
      (i) Cid kale; ama
      (ii) Loo qaadanayo inuu xiriir la leeyahay.
2) Xiriirka ka dhexeeya Cid iyo shirkad waa midka buuxinaya shuruudahaan soo socda;

a) Cidda leh saami le'eg ama ka badan 50% xuquuqda dakhliga, raasumaalka ama awoodda codeed ee shirkadda, ha ahaado;
   i) Keli ama koox
   ii) Si toos ah ama si dadban
b) Qofkaasi waa qof xiriir leh sida ku cad Xarafka (a) ee farqadan.

3) Laba daraf kuma sifoobayaan xiriirka lagu qeexay Faqradd(1)(a)(b) **haddii Wasaaradda** Maaliyadda oo mas'uulka ka ah **dakhliga ku** qanacdo in uu qofi qofka kale dantiisa ka shaqaynayn.
4) "Qaraabo" waxaa loola jeedaa dadka uu ka dhexeeyo xiriir dhalasho, guur ama korsasho oo gaarsiisan jiilka saddexaad.

**Kharashaadka aan laga goyn karin dakhliga la cashuurayo**

1) Kuwaan soo socda lagama jarayo dakhliga cashuurta:
   a) Kharashka qoys ama si gaar ah qofku u isticmaalay.
   b) Kharashaadka ku baxa arrimo musuqmaasuq.
   c) Macaashka, ganaxyada lacageed ee dawladdu u soo rogtay marka sharci la jebiyo.
   d) Kharashaad ku baxay waxaan la cashuurayn.
   e) Raasamaal ka faa'iidaystay Qoondada dhiirigelinta maalgashiga sanadlaha.
   f) Khasaare ama qiime dhac kasta oo ku yimaadda raasamaalka.
   g) Lacagahay shirkaduhu bixiyeen markay ku guulaysteen qandaraaska (signing bonus)

**Beeca eexda**

1) Haddii isfaham uu ka dhexeeya dad is leh, mid waliba cashuurta dakhli ee ku waajibtay waa inuu u xisaabiyo si waafaqsan kala iibsiga ama mucaamalo dhex marta sida dadka aan waxba ka dhaxayn.
2) Mucaamalada dhex marta dadka aan xiriirku ka dhaxayn waxay qiimaysaa cadadka, sifooyinka, una qaybisaa kharashaadka laga goynayo dakhliga si dad kala madax banana.
3) Waxaa la soo rogayaa sharciyo qeexaya faqraddan, waxaana la tix raaci talooyinka caalamiga ah ee arrintaan quseeya.
4) Haddii Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga u aragto qof ama sharikadi aysan u hogaansanayn faqrad hoosaadka (1) ee kor ku xusan, waxay bedeli cashuur xisaabeedka ay soo gudbisay shirkadaasi, marka ay hawsha ku guda jirtana waxay:
   a) Dib u qiimanaysaa waxyaalihii ka dhashay wada shaqaynta dadka xiriirka leh oo ay ku jiraan wax kala amaahashada;
   b) Waxay dib u qiimaynaysaa dakhliga, khasaaraha iyo lacag bixinta iyo
   c) Kharashaadkii laga jaray dakhliga sidii loo qaybiyey.

**Qiimaha ay ku fadhiso hantidu**

1) Kharashka shirkadi hanti ku soo gadato wuxuu ka kooban yahay;
   a. Kharashaadkii lagu soo qaatay hantidaas oo ay ku jirto haddii kharashaadkii ku baxay dhismaha, warshadaynta iyo soo saarista hantidaas.
   b. Kharashaadkii shirkadda kaga baxay wax ka beddelka, dayactirka iyo rakibitaanka hantidaas
   c. Kharashaadkii shirkadda kaga baxay iibinta hantida, iyo
   d. kharashaad kasta oo la xariira helidda ama iibinta hantidaas.
2) Kharashaadka hantidaas waxaan ka mid ahayn kharashaadka lagu sheegay faqradda (a), (c), (d), (e) ama (f) ee qodobka (10) iyo (20) oo ah kharashka aan laga jarayn faqradda 2aad ee Jadwalka

ama kharashaadkii ku jiray hanti oo meel kale lagu xisaabiyey.

3) Faqradaan, kharashaadka fudud ee uu galay qofka soo iibsanaya ama iibinaya hanti waxaa ka mid ah;
   a) Kharashaadka xayeysiinta, cashuuraha la xiriira xawilaadda iyo kharashaadka ku baxa lacag wareejinta;
   b) Kharashaadka ku baxa qareennada ku difaacaya maxkamadaha lahaanshaha hantida, iyo
   c) Mushaaharaadka ay u qaataan khidmadahooda xisaabiyaha, wakiilka, xaraashlaha, dalaalka, la taliyaha, qareenka, sahamiyaha ama qiimeeyaha ee soo hoos gelaya kharashaadka ku xusan faqrad hoosaadyada (a) iyo (b) ee kor ku xusan.

**Lacagaha Laga Helay Hantida La Iibiyey**

1. Qofku qiimaha uu hantida ku iibshey waxaa weeye;
   a) Cadadkii uu ka helay wareejinta hantidaas oo ka kooban;
      i) Cadadkii uu ka helay wax ka bedelka uu ku sameeyey hantidaas
      ii) Cadadkii uu ka helay dayactirka hantidaas, iyo
      iii) Qiimo kastoo loogu balan qaado mustaqbalka

**Iibinta Hantida**

1) Qofkii ah mulkiilaha hanti wuxuu iibinayaa marka:
   a) Uu wareejiyo hantidaas, uuna ku wareejiyo qaab iibin, bedelasho, xawilaad, qaybis iwm.
   b) Markasta oo uu qofku lahaan waayo hanti horay uu u lahaa
   c) Markay soo hoos gasho duruufaha lagu sheegay Qodobka 12(3) iyo 22 (5)
2) Iibinta hantida waxaa ka mid ah haddii hantidaas badhkeed la iibsho.

**Is waafajinta kharashaadka ku baxay lahaanshaha iyo lacagaha laga helay iibinta hantidaas**

1) Haddii qof soo iibsado hanti mar keliya ama uu ku soo iibsado heshiis keliya wixii kharash soo iibsigaas ku baxay waa loo qaybinayaa.
2) Wixii faa'iido laga helo hantida la iska iibiyey waa loo kala qaybinayaa kharashka ku baxay iibkaas.
3) Haddii qof iibiyo qayb ka tirsan hanti kharashka hantidaas waxaa loo xisaabinayaa sidan hoos ku qoran;
   a. Waxaa loo kala qaybinayaa qaybta uu gaday iyo qaybta uu weli mulkiyadeeda haysto; iyo
   b. Si waafaqsan qiimaha suuqa kadib markuu gado

**Ku Bixinta Cashuurta Si Saddex Biloodle Ah**

1) Qofka ku guda jira hawlaha qodista khayraadka dhulka hoostiisa waxaa ku waajib ah inuu bixiyo cashuuraha dakhliga saddexdii biloodba mar, uuna cashuurtaas ka bixiyo dakhliga ka soo gala qodista khayraadka dhulka hoostiisa iyo dakhliyada kaleba.
2) Lacag bixintaas saddex biloodlaha ahi waxay waajib tahay dhamaadka saddexdii biloodba mar ee sanad cashuureedka.
3) Sida ku cad faqraddaha qaybta (4) iyo (5), cadadkasta ee sanad cashuureed waxaa loo xisaabinayaa sidaan soo socota; (A-C)/B

**Macnaynta:**

- **A** waa qiyaasta la soo gudbiyey ee ku waajibtay shirkadda inay bixiso cashuur sanadeed
- **B** waa cadadka qaybaha harsan ee sanadka; iyo

- **C** qaybaha cashuureed ee uu ilaa hadda bixiyey.

4) Cidda ku waajibtay inuu cashuurta u bixiyo si qayb qayb ah, waa inuu faylkiisa cashuurta u soo gudbiyaa, faylkaas oo ay ku caddahay qiimaha guud ee ku waajibay inuu bixiyo sanadka, isagoo tix raacaya qaab farsameedka ay waajibisay Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga oo ay ku cadahay wakhtiga la bixinayo cashuur qaybeedka ugu horeeya.
5) Shirkadi waxay wax ka beddeli kartaa qiyaastii lagu sheegay faqrad hoosaadka (4) ee kor ku xusan sanad cashuureedka gudihiisa keliya haddii aynan ogolaan Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga sida ku cad qodobka (50) ee sharciga maamulka dakhliga Lr. 13 ee soo baxay 27 Oktoobar 2019.
6) Ujeedka faqraddaani waa in Wasaaradda Maaliyadda oo mas'uulka ka ah dakhliga u ogolaan karto in ay shirkadi markay cashuur bixinayso ku qiimayso cashuurtii ay sanadkii hore bixisay oo lagu daray qiime dheeriya oo munaasib ah.

**Deganaanshaha Shirkadaha Sida Lagu Aqoonsanayo**

Shirkadi Soomaaliya ayey degan tahay sanad cashuureed haddii:

a. Lagu abuuray Soomaaliya; ama
b. Sanad cashuureedkaas gudihiisa maamulka shirkaddu ay degan yihiin Soomaaliya

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE